DARKA MAADDA

Daabacaaddii 1aad

Muuse Maxamuud Ciise
NALA SOO XIDHIIDH

Qofkii danaynaya buuggan amaba haya wax talo ama tusaale ah oo ku saabsan, wuxu qoraha kala xidhiidhi karaa ciwaanka hoos ku qoran:

haji_musa@hotmail.com

Xuquuqda buuggan oo dhan waxay u dhawrantahay daabacan karo idan

@ Muuse Maxamuud
Stockholm, Sweden

ISBN: 978-91-
First

Hibayn

Nin dalkii ku nooloo
Waayuhu dabreenoo
Farxadii ka durugtiyo
Dibadaha mid joogoo
Isteres la darisoo
Walbahaarku daashaday
Dawadiisiibaan ahay
Magacaygu Deeqaay
Darka Maadda weeyaan

Erayga Buugga.

Buuggan waxa aan u hibeeyey waalidkay: Aabbe Maxamuud Ciise Faarax (Eebbe ha u naxariisto, Fardowsana ha ka waraabiyo). Hooyo Siraad Aw Cabdillaahi Ismaaciil.

Waxaan leeyahay Eebboow ugu naxariiso si ka fiican siday iigu naxariisan jireen markii aan yaraa.

Buuggan, waxa aan sidoo kale u hibeeyey dhallinyarada Soomaaliyeed ee Qurbaha ku nool.

HORDHAC

Bismillaahi Raxmaani Raxiim.

U qosol nolosha iyana ha kuu qososhee. Miyaynaan qosol u baahnayn? Oo maxaynu ugu baahan weynay? Ilaahow ha noo waayin nolol bilaa qosol ah. Umad kasta oo adduunyadani ku nooli waxay leedahay, dhaqan, hidde, af iyo taariikh uu facba faca ka sii danbeeya u sii gudbiyo. Waxaanay umad kastaa raad-raacdaa qoraallo ama farshaxan ay ka tegeen facyaashoodii hore. Hab nololeedka noocaas ah ayaa ah ka laga dheehan karo jirintaanka iyo ilbaxnimada umadi leedahay.

Bulshada Soomaaliyeed waxay ahaan jirtay bulsho reer guuraa ah, oo aan waxna qorin waxna akhriyin. Hab nololeedka noocaas ah ayaa dhaliyay in jiil waliba la dhinto dhaqankii, aqoontii iyo wixii uu hanti u lahaa. Sheekooyinkii murtida iyo maadda lahaa iyo suugaanta ayaad moodaa inay yihiin meelaha wali sii nool, ee u baahan in hadda weel lagu shubo, si jiilka soo socdaa u dhaxlo.

Buuggani waxa lagu soo ururiyey qayb yar oo ka mid ah sheekooyinka maadda iyo murtida leh ee bulshadeenu ku caano maashay. Waa sheekooyin cilmi badan xambaarsan oo ka waramaya waayo iyo wakhtiyo kala duwan. Waa sheekooyin ay wax badan ka baran karaan dhallinta Soomaaliyeed ee qurbaha ku dhalatay. Haddaba akhriste waan hubaa inaad in badan qosli doonto'e, fadlan la wadaag qosolka iyo farxadda inta aad wanaaga la jeceshahay.

Muuse Maxamuud Ciise (Dalmar)

AFEEF

Soomaalidu waxay tidhaahdaa `` Aqalkaaga hortiisana ood baa la dhigtaa, odhaahdaada horteedna afeef baa la dhigtaa´´. Markale Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa `` Nin habari dhashay hal ma seegi waydo´´. Aadmigana sidiisaba iin looma waayoo Eebbe uun baa dhamaysee, aan afeefto aniguna.
Buuggani waxa uu gelayaa badweyn aan hore wax looga qorin, haddii laga qorayna ay hadda uun bilow tahay. Maadaama oo ay sidaa tahay waxa uu yeelanayaa dhaliishiisa iyo waayahiisa. Waxa aan akhristayaasha ka raalli gelinayaa haddii ay sheekooyinka qaarkood dhibaato ku keenaan cid uun. Waxaan aad ugu dadaalay intii awoodayda ah in aan buugga ka ilaaliyo sheekooyinka dhaawacaya diinta iyo dhaqanka qiimaha leh ee Soomaaliyeed.

Akhriste waxa laga yaabaa in dad badani siyaabo kale duwan u maqleen sheekooyinka buuggan ku qoran. Waxa aan anigu u qoray sidii ugu badnayd ee aan u maqlay, aniga oo tixgelinaya goorta iyo goobta ugu badan ee dadkii sheekooyinkan iiga sheekeeyay ii sheegeen. Maadaama oo dadka Soomaaliyeed yihiin kuwo hadalka wax isugu gudbiya, oo qoraalku yahay mid inagu cusub, way adagtahay in la ogaado shakhsiyaadkii ay sheekooyinkani soo mareen, iskaba daa in la ogaado meeshii iyo goortii ay dhaceene. Sidaa darteed intooda badan magacyada buugga ku qorani waa kuwo aan anigu sameeyay. Haddiiba ay jiraan sheekooyin aan khalday goobtii ama goortii ay dhaceen waxa aan ka bixinayaa raalli gelin. Waxaanan leeyahay maaha mid ku talo gal ah ee waa ilduuf.

Muuse Maxamuud Ciise (Dalmar)

MAHADNAQ

Waxaan u mahad celinayaa Ilaaha awooda leh ee ii suurogeliyay inaan buuggan iyo kuwo kelaba soo saaro. Waxa kale oo aan abaal weyn u hayaa, dhamaan dadkii iga taageeray ururintii sheekooyinka, akhriskii iyo sixitaankii buuggan.

Dadkaas waxa ugu horeeya hooyaday Siraad Aw Cabdillaahi Ismaaciil oo Ilaahay ka sakow ii horseeday inaan farxad ku noolaado, inna bartay jidka toosan ee nolosha. Maadaama aabbahay dhintay anoo aad u da yar, waxa ay hooyaday noqotay macallinka koowaad ee noloshayda. Waxaana xusid mudan in hooyaday igu anqarisay sheekooyin badan oo buuggan ku duugan.

Waxa aan abaal weyn u hayaa Xiis X. Cismaan X. Axmed iyo Xaaskiisa Sahra Ismaaciil Ibraahim oo iigu deeqay sheekooyin badan oo buugga ku jira. Waxa kale oo aan mahadnaq cuddoon iyana ku maamuusayaa Xasan Cumar Hoorri, Xasan Cabdi Madar, Maxamed Xirsi Guuleed iyo Sayid-Axmed Maxamed Yuusuf, oo igu dhiirri geliyay qoristii buuggan, iyagoo qayb libaax lehna ka qaatay akhriskii iyo sixitaankii buugga.

Taasi mid la mid ah waxaan abaal ma guuraan ah u hayaa asxaabtayda kala ah: Axmed
Maxamuud Cilmi (Axmed Shawqi), Khaalid Jaamac Qodax, Cabdiladiif Cismaan Caabi iyo Cabdiqaadir Dayib Askar oo gacan weyn iga siiyay kala haadintii sheekooyinka iyo waliba sixitaankii higgaadda.

Waxaan mahadnaqaa mid u dhigma u hayaa walaalkayga qaaliga ah Cabdiraxmaan Axmed Yuusuf (Maano) oo ku faro yaraystay habaynta iyo samaynta jaldiga buuggan. Waxa kale oo aan u mahad celinayaa Yuusuf X. Cabdillaahi Xasan oo ah

halyey weyn oo markasta u taagan dhiirrigelinta dhallinyarta oo gacan weyn iga siiyay soo saaristii buugga.

GOGOLDHIG

``Mar haddii aynaan hayn xoolihii aynu maali jirnay, ee innaga jeedin jiray hawlaha kale oo dhan. Maanta aan qalinka maallno´´

Sayid-Axmed M. Yuusuf: Qoraa sare oo ku xeel-dheer Taariikhda Somaliland, waana gudoomiyaha Urarka Qoraaga Somaliland, Stockholm, Sweden.

Buugga la magacbaxay DARKA MAADDA, waa buug lagu soo ururiyey dhacdooyin ujeedooyin kala jaadjaad ah leh. Waxa laga yaabaa in xilligii arrimahaasi dhaceen, aanay ku qotomin ´´ Maad´´ bulshada dhexdeeda oo sheekooyinkaasi dhexmushaaxeen baa ka dhigay wax ku xidhiidhsan Xikmad ama Maad.

Buuggaagta ku qoran Afsoomaaligu, waa ay yar yihiin, waxaase soo iftiimaya kacaan cusub oo jecel in ay wax qoraan. Waa hubaal in aynu u baahannahay dhammaan laamaha bulshada in wax laga qoro. Waxa aynu garan karaynaa in ay in badani luntay xikmaddii sida: ´´ Halkudhegga, Halxidhaalaha, Maahmaahda, Maadda iyo Madadaalada´´.

Gaar ahaan tii Miyigeenna oo ah ta uu ku aroorayo dhaqankeennu. Haddii aan idhaahdo ´´ Sheekooy sheeko, sheeko xariir ah, Shilin baa dhuustay, geeday sheegtay´´ in badan oo akhriyeysa qoraalkani waa ay garanayaan, in ay ahayd Sheeko Xariiro ka soo jeedda Miyigeenna.

Waana hubaal in in kale oo badani aanay maqalba. Haddaba buugga Darka Maadda, waxa ku jira tiro badan oo dhacdooyin ah, oo kala ujeeddo ah. Laakiin ay kulminayso sida ay bulshada ugu baahday, ee loo soo qaato marmarka la kaftamayo ama mararka qaar loo adeegsado xikmad ahaan.

Buuggan oo uu qoray Muuse M. Ciise (Dalmar) waxa uu horteenna soo dhigay, buug ay ku kaydsanyihiin sheekooyinkaasi. Kollayba ma fududa qoritaanka dhigane ama qorane ku qoran Farsoomaali. Haddii ay tahay higgaada iyo sixitaankeeda, haddii ay tahay adeegsida erayada sida guud loo wada fahmi karo, ee aan ahayn Hadal-guriga iwm.
Sidaa awgeed waxa aan leeyahay qoraagu waxa uu innaga mudanyahay Hambalyo. Hawshan oo kale waa mid loo baahnaa, inkastoo ay jiraan haatanba buuggaag kale oo mawduucaas ku saabsan, fari´se kama qodna. Dhankasta oo laga eego laamaha Bulshada waa loo baahanyahay in qoraal lagu kaydiyo. Buuggani waxa uu si koobkooban oo ay fududtahay fahamkoodu kuugu soo gudbinayaa Sheekooyinkaas, oo aad u xiise badan. Waxaan se jecelahay in aan hoosta ka xarriiqo, in dhacdooyinkaas aan intooda badan la garanayn qofkii ama qofafkii ay ka dhacday. Qaar kale oo badanna laga yaabo in si toos ah loo garanayo ciddii ay ku dhacday.

Sheekooyinka noocan oo kale ah, waxa ay dhexmushaaxaan bulshada dhexdeeda, waa uun la iswada gaadhsiiyaa, iyadoon la garanayn cidda ay ku dhacday. Waa na sida maahmaahyadda badidooda oo aan la garanayn qofka sameeyay. Inkastoo maahmaahyo la garanayo na jiraan, sida sheekooyinkan ba qaar loo garan-karo.

Qoraaga buugga qoray waa Muuse'e waxa aan leeyahay hawl baad qabatay ballaadhan oo loo baahnaa. Muuse waxa uu qoray buug hore oo sheeko ahaa, kan oo ah kii sii labaad waxa aan odhan lahaa ka seddexaad na soo dedeji.
Waxa aan dareensanahay in Muuse yahay Maansoole curin kara sheekooyinka, isla markaana tirin kara jaadadka Maansada.
Mar haddii aynaan hayn xoolihii aynu maali jirnay, ee innaga jeedin jiray hawlaha kale oo dhan. Maanta aan qalinka maallno. ´´ Geelaa markuu dararanyahay laba nin duugtaaye´´.

Buuggaagta Afsoomaaliga ku qoran aan darandoorino, oo sannadkiiba 100- 1000 ha soo baxaan. Waxa aan qormadan ku soo gebogabaynayaa, sheekooyinka ku jira buuggan, in badan oo xikmad ah baa ku jirta, in badan oo malaa kaa ba yaabin doonta baa ku jirta, sidaa daraadeed in aad akhrido waxa kugu sii riixaya Maadda oo ah wax qof kastaaba u baahanyahay.
Mar haddii magaca buugga uu yahay DARKA MAADDA, waxa aan odhan lahaa oo aan ku soo afmeerayaa Gogoldhiggan nin kastoow Darka kaalay oo ku harraad bax. Waa na dedaal uu muujiyay qoraagu oo aan leeyahay mar kale iyo mar kaleba Hambalyo.

Sayid-Axmed M. Yuusuf: Qoraa sare oo ku xeel-dheer Taariikhda Somaliland, Stockholm, Sweden.

`` Darka Maaddu waa kayd murti iyo madadaalo ku illowsiinaya murugada kuguna beeraya farxad. Waa wehel xilli aad ugu baahi badan tahay kula soconaya``

Xasan Cabdi Madar: Qoraa Sare, Mufaker, Maansoole iyo Xeel-dheere Aqoonta Bulshada

Darka maadda waa buuggii labaad ee Muuse Maxamuud Ciise (Dalmar). Waxa uu hore u qoray buugga sheekada ah ee Hantaaqo Jacayl oo dhallinyaradu aad u jeceshahay. Mar hadduu qoraalka sheekada ku bilaabay waa mid la filan karo inuu wax ka yidhaahdo dhinaca maadda iyo madadaalada. Buugga Darka Maaddu ma aha maad iyo madadaalo keliya. Waxa ku dhan sheekooyin nafta u raaxaynaya, mar kaa qoslinaya, marna kaa fikirsiinaya. Sheekooyinkaasi madadaalo ka sokow waa kuwo salka ku haya xikmad, waayo aragnimo iyo hogatusaale. Sheekooyinka badankoodu waa kuwo loo adeegsan karo waayaha hadba la joogo, dhinacna waa ka xasuus waayo aragnimo la soo maray. Buuggu waa

kayd murti iyo madadaalo ku illowsiinaya murugada kuguna beeraya farxad. Waa wehel xilli aad ugu baahi badan tahay kula soconaya.

Habka sheekooyinka buuggu u kala qaybsan yihiin baa iyana ah mid xiiso leh sida sheekooyinka miyiga iyo kuwa magaalada.
Tusmada buuggu waa mid kuu saamaxaysa in kolba sheekada ku soo jiidata aad akhriskeeda ku horreyso iyadoo midiba ta kale kuu sii dhiibi doonto adiga oo aan ogaan doonin goor aad buuggaba dhammaysay.

Ma aha buuggii ugu horreeyay ee laga qoro mawduucan mana noqon doono kii ugu danbeeyay balse waa dhito muhiim ah oo ka mid ah dadaalka qofku bulshada ku biirin karo.

Sida buug kasta oo la qoraa uga warramayo dhinaca nolosha ee uu ka hadlayo ayaa buugganina si weyn diiradda ugu saarayaa inta kaga aaddan nolosha bulshada.

Wax kasta oo la qoraa dhaliil ma waayo, in buug la qoraa dhaliyo afkaar iska hor imanaysa, dhaliil iyo ammaan labadaba wuu noqon karaa.
Hadduu ammaan yahay waa lagu sii dhiirran karaa hore usii wadkiisa, hadday dhaliili jirtana waa mid carin karta garaadka oo dhalin karta fikir xor ah.

Muuse wuxu la yimid dadaal mudan in la dhiirri geliyo. In wixii talo ah ee toosin ah lagu kordhiyaana waa mid meesha taal.

Ugu dambayn Darka Maaddu waa buug mudan in la akhriyo waana kayd dhaxal gal ah.

Xasan Cabdi Madar: Qoraa Sare, Mufaker, Maansoole iyo Xeel-dheere Aqoonta Bulshada

`` *Dadku gooni daaq ma aha eh, waa bulsho ku-nool´´*

Maxamed Xirsi Guuleed (Abdibashir): Abwaan Qoraa ah, Stockholm, Sweden Maxamed Xirsi Guuleed (Abdibashir)

Dadku gooni daaq ma aha eh, waa bulsho ku-nool. Bulshaduna waxay macno ku leedahay marka ay isla wadaagto dhibka iyo dheefta, harumarka iyo hawlaha, iyo dabcan madadaalada iyo maaweelada. Isla jaan qaadka bulshadu kuma dhisna oo keli ah la tacaalka nolosha adag iyo xallinta mushkiladaha. Waxa aan laga maarmi karin, nasasho, raaxaysi iyo baashaal intaba. Marka aad aragto bulsho faraxsan oo qoslaysa waxad dareemaysaa in caafimaad meesha yaallo. Marka aad aragto bulsho raaxaysanaysa oo tamashleynaysa, waxa aad dareemaysaa in ladnaasho iyo barwaaqo meesha ka jirto. Haddaba bulshooyinku waxay samaystaan suugaan iyo sheekooyin kala duwan oo ujeedada qaarkood laga leeyahay tahay in lagu qoslo uun. Buuggan Darka Maadda ee aad hadda aad gacanta ku hayso ama aad isha marinayso ayaa isla mawduucaas ku saabsan. Wuxu qoraa Muuse M. Ciise (Dalmar) ku soo ururiyey sheekooyin kala jaad jaad ah oo u badan kuwii dhalinyarada reer magaalka ahi ku maadaysan jireen. Waa sheekooyin iyo dhacdooyin ku saabsan, reer miyi magaalo yimid ama reer magaal baadiye tegay, ama qof qurbaha ka yimid oo dhaqamo kale ku saamoobay, ama dad afku kaga dhacay wax gef ah ama si kale u qaldan. Waxa kale oo ku jira isku dhaca dhaqamada kala duwan ee heer caalami, heer qaran ilaa heer gobol.

Buuggan oo ah kii labaad ee uu soo saaro qoraa Muuse M. ciise, waa buug ku habboon qof kasta iyo da´ kasta. Yaan u baahnayn in uu helo wax mararka qaarkood illowsiiya daalka iyo walbahaarka nolosha?, yaan rabi lahayn wax ka qosliya ama uu kaga qosliyo dadka uu jecelyahay la sheekaysigooda? Dabcan waa la wada jeclaan lahaa taas. Haddaba waxaad arrimahaas oo dhan ka

helaysaa buuggan, oo uu qoray Muuse Dalmar oo Ilaahay hibo u siiyay samaynta iyo ururinta sheekooyinka qosolka leh.

Maxamed Xirsi Guuleed (Abdibashir): Abwaan Qoraa ah, Stockholm, Sweden Maxamed Xirsi Guuleed (Abdibashir)

QAYBTA 1AAD

Sheekooyin murtiyeed qosol badan oo ka dhacay miyiga

1. Aniga ma naag xun buu i moodayaa?

Ducaale oo reer magaal ahaa ayaa waxa uu booqday reerkooda oo degganaa miyiga. Goor fiid ah markii uu soo gaadhay ee uu in yar nastay, ayaa waxa u timid gabadh ay ilma-adeer ahaayeen oo la odhan jiray Caasha-luul iyadoo markaas adhigii soo hoysay. Markii la isa salaamay ayaa waxa uu Ducaale siiyay Caasha-luul midh nacnac Jaglayd ah oo uu jeebadda ku sitay. Caasha Luul oo xishood badani ka muuqdo ayaa inta ay jaglaydhkii qaadatay u dhaqaaqday dhankii guriga waxaanay oohin la fadhiisatay muskii reerka. Waris oo ahayd Ducaale hooyadii oo adhigii lisaysa ayaa waxa ay maqashay gabadhii Caasha oo muska dabadiisa ka ooyaysa. "Naa maxaa kugu dhacay ee aad la ooyaysaa?`` baa ay iyada oo yaaban weydiisay gabadhii. ``*Ducaale ayaa Jaglaydh i siiyay ee aniga ma naag xun buu i moodayaa*?´´ Baa ay ku jawaabtay Caasha iyada oo ilmada iska tiraysa. Cajaayib waxay maqli jirtay uun hablaha xun xun ee magaalada jooga ayaa jaglaydh lagu shukaansadaa.

2. Samcu wa daaca

Waxay ahayd xilli ay abaar ba'ani jirtay, deegaankana laga wada hayaamay. Qolo safar ah oo aad u harraadan ayaa waxay ku soo baxeen reer jees ah. Waxay ka xishoodeen inay reerka biyo waydiistaan iyagoo tiro badan. Sheekh Diiriye oo safarka ugu da'

weynaa, harraad ba'anina hayo ayay u cuntami wayday inuu reerka dhaafo iyadoon la waraabin. Dhanka kalena, waxa uu ka eegayay sida aaney macquul u ahayn in ay reerka biyo ka wada helaan. Haddaba, isaga oo oday kale oo sheekha oo safarka ka mid ahaa u afjaaqaya waxa uu ku yidhi, *´´ Qaryadaa qurbigeena ah qaliilu minal maa'i, inooga soo dalbi ee shajaradaa diligeeda iska sii tadajuc´´* taasi oo micnaheedu yahay reerkaa agteena ah ayaan in yar oo biyo ah inooga soo qaadiye, geedkaa hadhkiisa iska sii yara jiifso. Sheekhii kale oo fahmay ayaa ugu jawaabay, `` *Samcu wa daaca´´* oo micnaheedu tahay waayahay. Raggii kale ee safarka ka mid ahaa oo u qaatay inay culimadu digrinayaan, ayaa safarkii iska sii watay. Sheekh Diiriye iyo wadaadkii kalena reerkii ayey biyo ay cabbaan iyo kuwa ay ku waysaystaanba ka heleen, safarkiina kaga daba tageen.

3. Illaahii ridayda madow caanaheeda cadeeyoow Allaahu Akbar

Islaan reer miyi ah oo aan weligeed tukan ayaa Illaahay soo hanuuniyay, waxaanay bilowday inay waajibaadkii Ilaahay gudato oo ay Salaadii bilowdo. Wax aqoona diinta uma aysan lahayn laakiinse way hanuunsanayde, way soo waysaysatay waxaanay salaaddii ku xidhatay sidan: ``*Illaahii ridayda madow caanaheeda cadeeyoow Allaahu Akbar´´*.

4. Diyaaraddii Bariiska laga karsaday

Sida la ogyahay dadka Soomaalida ahi waxay ahaayeen dad xoolo dhaqato ah oo noloshoodu ku tiirsanayd miyiga. Haddaba intii aanay ilbaxnimadan casriga ahi soo gaadhin gayiga

Soomaaliyeed ayaa beri waxa ay diyaaradi soo dul martay qolo reer miyi ah, waxay ahayd wax ku cusub horana umaysan arag. Way yaabeen waxaanay is yidhaahdeen malaha dunidii baaba la rogayaa. Markiiba inta culimadii loo yeedhay ayaa laga karsaday bariis cad. Waxaanay ilaahay ka baryeen inuu ilaahay balaayadeeda ka xijaabo.

5. Waxa lagu goblamay waa tii gadhka lahayde

Nin maanso yahan ahaa oo jaajaalenimo lagu yaqaanney ayaa beri u yimi qolo ay geeri ku dhacday oo wiilkoodii curdeed wadkii helay. Markii geeridii loo sheegay ayaa halkii uu tiiraanyo muujin lahaa waxa uu meriyay afarleydan gaaban, isaga oo ka waramaya isba dhibaatada haysata oo ah in xoolihii ka baaba'een, adhigiisii yahay qaar xanuun u dhintay iyo qaar ildaranba, waxaanu ku jawaabay:

Adduunyada dhibaatiyo,

Naxdini kama dhamaadaane,

Anaba midbaa dhicisay,

Oo neef ka soo dhacaye,

Ridii Garo, ridii geeso kala jeexan,

Mar aan soo dhex maray,

Garana way dhogor madoobayde,

Waxa lagu goblamay waa tii gadhka lahayde.

6. Shaahii furinku cabay

Nin reer miyi ah ayaa beri waxa uu soo galay makhaayad, waxa uu ka dalbaday quraac waxaana loo keenay xabad furina iyo koob

shaaha. Xabaddii furinka ahayd ayuu dhex galiyay shaahii, cabbaarna ku daayay. Furinkii baa shaahii oo dhan cabay oo dhameeyay. Odaygii baa waxa uu u yeedhay wiilkii makhaayada ka shaqaynayay, waxaanu ku yidhi, ``Waar dee noo keen koob shaaha´´. Wiilkii oo yaaban ayaa ugu jawaabay, ``Sownigii shaahaagii kuu keenay, ma mid labaad baad rabtaa´´?. Odaygii oo cadhaysan ayaa ku yidhi, ``*Waar miyaad waalan tahay koobkii hore furinkaa cabaye ma anigaa cabay? Ileen sidaas uun buu calooshaydana u cabi lahaaye´´*.

7. Awoowgaa la gub dheh, tolow daankaba ma dhigtaa?

Oday reer miyi ah oo abu xaraaro ah ayaa waxa uu soo fadhiistay meel siyaaro ah. Waxa la bilaabay qaybintii shaaha, waxaana laga soo bilaabay geeskii uu isagu fadhiyay. Markii koobkii u horeeyay loo soo fidiyay ayuu saluugay yaraantiisa ka dibna inta uu tusbixii rogay ayuu ninkii shaaha qaybinayay ku yidhi ``Anigu digrigii baan wadaaye i dhaafi horta", sidii baana lagu dhaafiyay. Koobba koobkuu ka danbeeyo ayuu ka sii yar yahay, waxaanu wadaadku dhawrayaa in loo dhiibo mid saydheere ah ama koob nin weyn. Waxay qaybintii socotoba oo uu isna yidhaahdo i sii dhaafiya digrigaa meel fiican ii marayee, waxaa loo dhiibay kii u danbeeyay oo ahaa koob aad u yar ahna kuwa yar yar ee bunka lagu cabo.

Inta uu haddana saluugay ayuu yidhi ``Wali digrigii maan dhamayne i dhaafi aniga´´.

Ninkii qaybinayay ayaa ugu jawaabay, ``Sheekh koobkanaa ugu danbeeya'e qaado´´

Sheekhii inta uu xanaaqay ayuu mar kaliya koobkii fiiqsaday, koobkiina inta uu si cadho leh u eegay yidhi, ``*Tolow kii kan soo sameeyay muxuu uga dan lahaa? Awoowgaa la gub dheh, tolow daankaba ma dhigtaa?´´*.

8. Alla hoognay oo wali adhigii ma sidiibuu u saalo dhigaa?

Wakhti ku beegan lixdamaadkii ayaa gabadh reer miyi ahi waxay u shaqo tagtay dalka Yemen oo dad baddan oo Somali baayacmushtar ahi ka shaqaysan jireen. Muddo markii ay halkaasi ku maqnayd ayaa waxa ay ka soo degtay magaalada Berbera, isla maalintii xigtayna waxay u kacday reerkooda oo miyiga degganaa. Waxa uu gaadhigii sii wadaba waxay reerkii u soo gashay goor fiida oo ay dumarkii adhyihii lisayaan. Salaan kadib ayaa iyada oo diraca kor u qaadanaysa kana khashaafaysa xeradii xoolaha waxay dumarkii xoolaha lisayay ku tidhi, `` *Alla hoognay oo wali adhigii ma sidiibuu u saalo dhigaa?´´*

9. Ee hooyo waa sidee tani maba dhiiqaysee

Beri baa gabadh reer miyi ahi waxay u shaqo tagtay dalka Jabuuti. Markii ay in muddo ah ku maqnayd ayay waddanka ku soo noqotay, waxaanay u timid reerkooda oo miyi yaalay. Hablihii reerka waa la wada guursaday oo islaanta reerku miciin badan oo xoolaha la dhaqa may haysane, waxay gabadhii gacan ka siisay hooyadeed lisidii adhiga oo inta ay galaan weyn soo qaadatay ayay dhankeedii ka gashay xeradii. Gabadhii iyada oo sidii qof xoolaha ka baqaya kolba neef iska ilaalinaysa ayaa waxay lugta soo qabatay orgi weyn oo meel agteeda ah raamsanaya. Inta ay xiniintiisii tuujisay ayay si cod sare ah ku tidhi hooyadeed `` *Ee hooyo waa sidee tani maba dhiiqaysee´´*.

10. Maxaa horta sodohda keenay meel ninka inanteeda qaba gacantiisu gaadhayso

Beri baa nin inan la-yaal ahi isagoo xoolihii soo xareeyay waxay isku dhaceen sodohdii. Cabbaar markii ay ku yara qaylisay ayuu isna waxa uu ahaa nin dulqaad yare uu dhirbaaxo ku jiiday islaantii. Islaantii oo barooranaysa ayaa reerkii ku dhex dhacday. Odayaashii ayaa layskugu yeedhay waxaana la dhigtay gogol. Markii ay odayaashii geed hoostii iskugu yimaaddeen ee gartii la galay ayaa oday ka socday dhankii sodohdu yidhi, `` Maanta arrin weyn baanu idiinka fadhinaa, waxaynu hore u aragnayna maaha xaajadani, markaa xaal iyo xumaynba waanu idiinka fadhinaa.´´ Iyadoon hadal badanba la odhan ayaa oday Qoorgaab oo ka socday dhankii ninka sodohda dhirbaaxay inta uu kacay yidhi, `` *Horta intaynaan wax kale ka hadal, maxaa horta sodohda keenay meel ninka inanteeda qaba gacantiisu gaadhayso?´´*.

Xaggii baana ninkii loogu garaabay xaajadiina ku dhamaatay.

11. Ilaahay inuu garsoore yahay waan ogaaye, laakiinse inuu kuunyo kuunyo ku badayo maanan moodayn

Beri baa nin geel jire ahi waxa uu u soo haasaawe doontay gabadh ay isku deegaan ahaayeen oo adhi la joogta. Markii uu u soo dhawaaday ayaa iyada oo sii jeeda oo xadhig soohaysa, waxa uu kaga yimi dhanka danbe. Si uu uga nixiyo ayuu inta uu warankiisii la soo baxay ku ganay dhankeedii, isaga oo islahaa ku ag dhufo, nasiibdarrose warankii gabadhii badhiduu ka haleelay halkii baanay ku qudh baxday.

Ninkii talaa ku ciirtay, inta uu raadkiisii baabiiyay ayuu meeshii isaga cararay. Inantii maalin danbe ayaa maydkeedii meeshii laga helay, halkii baana lagu aasay iyada oo aan la garanayn waxa dilay.

Muddo markii ay ka soo wareegtay ayaa ninkii oo maalin maqaaxi hortaagani waxa uu ku yara tiirsaday warankiisii, nasiibdarrose inta uu warankii ka hoos baxay ayuu badhida ka galay. Markii uu laba cisho miyir la'aa ayaa waxa uu soo maaxday maalin saddexaad waxaanu dadkii ku yidhi, `` *Ilaahay inuu garsoore yahay waan ogaaye, laakiinse inuu kuunyo kuunyo ku badayo maanan moodayn´´* Halkii buu ka qirtay inuu isagu gabadhii dilay uuna magteedii bixinayo.

12. Hoo yoo soo qub

Malko waxay ahayd islaan reer miyi ah, waxaanay wax ubad ah dhashay hal wiil. Waxa ay had iyo jeer Ku dedaali jirtay sidii uu inankeedu u noqon lahaa mid qayrkii ka roon.

Marka ay adhiga listo labada riyaad ee ugu caanaha badan ayay caanahooda siin jirtay, waxaanay jeclayd in inankeedu koro oo uu noqdo Nin xoog ah oo qayrkii iska celiya. Nasiibdarrose wiilkeedu ma uusan noqon mid tamariya oo jidhkiisu diiro. Muddo markii ay sidaa ahayd ayaa
Maalintii danbe goor fiid ah oo xoolihii la soo xareeyay waxa ay Malko listay ridii Giiro oo ahayd rida adhiga ugu caanaha badnayd, inta ay galaan caano ah oo xoorinaya inankeedii u fidisay ayay ku tidhi, `` *Hoo yoo soo qub´´* .

13. Sii wad wadi kari maynee kuli wada bir

Yuusuf oo ahaa nin geel jire ah ayaa beri tagay gaaf. Waa aroos miyi iyo xaalkiiye waxa bilaabantay su'aalo iyo hal xidhaalayaal ay dhallintu isku xujaynaysay. Cabbaar markii ay socotay ayay su'aashii Quule soo gaadhay, waxaana la waydiiyay inta nooc ee uu gawaadhida ka yaqaanno. Quule ayaa inta uu u kacay si ay kalsooni ku dheehan tahay ugu jawaabay,`` *Dhigadheere, Xaajiyad, Gaadhi-ximaar iyo Kaariyoone, sii wad wadi kari maynee kuli wada bir´´*

14. Dhulka duub

Beri baa doob guur-doon ahi waxa uu u haasaawe tagay gabadh gashaantiya oo ay isku beel ahaayeen. Cabbaar markii la haasaawey, lagana wada hadlay guur iyo in nolol qoys la wada dhiso ayay inantii ninkii su'aalo xujo ah waydiisay bal si ay u qiimayso inta uu garaadkiisu gadhsiisan yahay.

Su'aashii koowaadna waxay ahayd.

Gabadhii: *Dhulka duub.*

Wiilkii: *Waayahaye horta adigu ka kac*.

Gabadhii oo aad ugu qanacday sida fiican ee uu inankii ugu jawaabay ayaa haddana intay wiilkii dhagax u dhiibtay ku tidhi, *hooyoo sooh.*

Wiilkii: *Waayahaye horta adigu calali*.

Gabadhiina sidii bay ugu qanacday jawaabihii wiilka gayaankeeda ahaa, halkii baanay isku guursadeen.

15 . Ruush maxaa noo keenay sownagii waa hore kala tagnay

Sannadkii 1977kii oo ku beegnayd markii uu xumaaday xidhiidhkii u dhexeeyay Soomaaliya iyo dawladdii Ruushka ayaa Muuse Dheere iyo sarkaal Maraykan ahaa oo u wada shaqaynayay hay'adda Qaramada Midoobay ee Soomaaliya ay ku murmeen in dadka Soomaaliyeed wada siyaasi yihiin iyo inkale. Isagoo sarkaalka Maraykanka ahi ku doodayay inay Soomaali oo dhammi yihiin dad siyaasiyiina ayna adagtahay in la maamulo.

Muuse oo taas ka soo horjeeda ayay sarkaalkii xaddi lacageed oo badan sharad ku wada dhigteen.

Maalin danbe iyaga oo safar shaqo ugu kicitimay magaalada Berbara ayaa waxay waddada kula kulmeen nin reer miyi ah oo adhi la jooga. Inta ay gaadhigii istaajiyeen ayay ku leexdeen, waxaana dhex martay sheekadan.

Ninkii Maraykanka ahaa: *Waxaanu doonaynaa inaad naga iibisid neef adhiya* Ninkii reer miyiga ahaa . *Oo yaad tihiin horta?*

Ninkii Maraykanka ahaa: *Waxaanu nahay niman Ruusha.*

Ninkii reer miyiga ahaa: *Oo Ruush maxaa noo keenay sownagii waa hore kala tagnay.*
Xaggii bay ninkii reer miyiga ahaa kaga tageen sharadkiina Muuse looga helay.

16 . Haasaawe

Beri baa nin guurdoon ahi waxa uu u haasaawe tagay gabadh ay isku beel ahaayeen. Goor casar ayuu u yimid inantii oo harar tolaysa uuna la joogo wiil yar oo 5 jir ah oo ay walaalo yihiin.

Gabadhii si fiican ayay u soo dhawaysay ninkii guurdoonka ahaa, halkii baanay sheekadii iskugu dubo dhacday.

Cabbaar markii ay sheekadii u socotay ayaa gabadhii naqas ka fakaday, inta ay wiilkoodii yaraa dhirbaaxday ayay ku tidhi, `` *Waar nagala kac dhuusada waxyow edebta daranlii*.´´ Yarkii oo aan wax denbi ah samayn ayaa cayaartiisii iska sii watay.

Muddo markii ay sheekadii u socotay ayaa ninkii haddana naqas yari ka fakaday, isna inta uu yarkii madaxa ka dhirbaaxay ayuu ku yidhi , `` *Waar naga daa bahasha balo ku dishee*.``

Gabadhii oo la socotay in naqasku ka yimid ninka oo aanu yarka ahayn ayaa inta ay xanaaqday ninkii ku tidhi, ``*Waar waan ku maqlayaa inay adiga tahaye maxaad yarka u dilaysaa?´´*

Inta uu qoslay ninkii ayuu gabadhii ugu jawaabay, `` *Waxaan moodayay in kolba keenii dhuusaa uu yarka dhirbaaxayo. ´´*

17. Agaah! Awoowgaa la gub! Waar wuxu dhar badanaa ma Sanduuqbaa?

Xilli ku beegan badhtamihii qarnigii labaatanaad ayaa nin reer magaal ahaa oo in muddo ah ku maqnaa Cadan waxa uu booqday reerkooda oo yaalay agagaarka Awaare oo ah deegaanka Soomaalida Itoobiya. Goor fiid cawl ah ayaa isaga iyo rag kale oo ardaaga kulaalayaa waxa ay u diyaar garoobeen salaaddii maqrib. Markii ay waysaysanayeen ayaa ninkii reer Cadmeedka ahaa

bilaabay inuu dharka culus ee uu xidhan yahay iska kala dhigo, waxa aanuu is garab dhigay bakooradiisii, haddana koofiyaddii, haddana cumaamaddii, haddana koodhkii, haddana laaskoodhadii, haddana shaadhkii, haddana khamiiskii. Markii uu intaas iska saaray ee uu soo reebay surwaal, garan iyo sharabaadadii ayuu u kacay dhankii saligii uu ku tukanayay. Guulane oo ka mid ahaa raggii reer miyiga ahaa ee la joogay oo goorahanba la yaabanaa waxan oo dhar ah ee uu ninku xidhan yahay iyo sida uu isagu ugu maran yahay macawis yaroo duuga iyo shaadh kaliya ayaa inta uu madax qabsaday waxa uu yidhi, ``*Agaah! Awoowgaa la gub! Waar wuxu dhar badanaa ma Sanduuqbaa?*``

18. Alla maxaad ii toosiseen meel aydaan garanaynbaan joogee?

Beri baa nin sheekha oo safar ahi waxa uu u soo hoyday reer jees cidla ah yaala, waxaanu ku soo beegmay goor fiid ah oo markaas uun xoolihii la soo xareeyay. Maadaama ay culimadu tixgalin badan ku lahaayeen bulshada, Sheekhu waxa uu rajaynayay in si fiican loo sooryayn doono, laakiinse taasi ma ay dhicin waxaana loo keenay uun goraf caano ah halkii uu hilbo waaweyn ka sugayay.

Haddaba Sheekhii oo saluugay habka loo sooray ayaa goor saqdii dhexe ah oo la kala seexday waxa uu la soo baxay toosh weyn oo uu haystay, inta uu go'iisii hoosta ka galay ayuu tooshkii shiday. Uurdoox oo ahaa curadka reerka oo meel sheekha agtiisa ah hurday ayuun baa arkay sheekhii oo siraatay. Inta uu argagaxay ayuu u kacay dhankii guriga aabbihii, waxaanuu toosiyey aabbihii isaga oo u sheegay inuu sheekhu yahay awliyo halis ah oo uu siraatay. Reerkii oo dhanbaa isku soo baxay waxaanay arkeen sheekhii oo siraadanaya. Markiiba waxa ay soo qabteen wankii adhiga ugu macaa oo aad yaabto inta ay macashu leeg tahay, xagiibaanay dhagta dhiiga u dareen, isla markiibana hilbihiisii dabka la saaray.

Reerkii oo naxsan ayaa sheekhii toosiyay si uu hilbaha u cuno. Sheekha oo goorahanba dhagta kala socday ayaa inta uu soo booday waxa uu yidhi, ``*Aah ..... Alla maxaad ii toosiseen meel aydaan garanaynbaan joogee!*
´´.

19. Adeer timirtii hore ba dab loo waa

Beri baa nin safar ahi waxa uu u soo dhaxay jees reer miyi ah, si fiican ayay u sooreen habeenkii iyagoo wan yar oo baraar ah u qalay. Markii uu aroortii ka sii tagayay ayaa isna waxa uu siiyay kiish timira oo uu sitay.

Reerkii waxay garan waayeen Timirtii iyo sida loo cunayo, waxaanay u qaateen in loo baahan yahay in la kariyo.

Maalin kale ayaa nin kale oo safar ahi waxa uu u soo dhaxay reerkii. Goor ay cawaysin tahay oo ardaagii la kulaalayo ayaa ninkii safarka ahaa soo saaray kiish Timira, kuna yidhi reerkii, `` Hooyoo cuna Timirtan´´.

Odaygii reerka ayaa inta uu Timirtii dhinac isaga riixay yidhi, `` *Adeer timirtii hore ba dab loo waa´´.*

20. Dhalaal Caliyeey dhankaa ka mareey

Nin reer miyi ah ayaa beri u soo safray magaalada, waxa uu watay dhowr neef oo adhi ah markii laga iibsaday ayaa waxa uu reerkiisii u iibiyay raashin iyo wixii ay u baahnaayeenba, isna waxa uu gatay shaadh aad u dhalaal badan. Maalintii danbe ayuu magaaladii ka soo caraabay, waxaanu goor fiida soo gaadhay reerkiisii. Habeenkaas waxaa beesha ka jiray aroose, inta uu shaadhkiisii cusbaa xidhay ayuu arooskii tagay. Sidii caadada ahayd ayaa cawaysinkii

dhallinyaradii ciyaar qabsatay, isna waxa uu ahaa nin bootinta ku fiicane inta uu shaadkiisii geed aan sidaa u sii fogayn saaray ayuu gabadh u maray. Waxa uu ahaa nin guurdoon ahe inta uu sacab aad yaabto kaga dhawaajiyay ayaa isagoo hablihii la hadlaaya waxa uu yidhi, `` *Na waxaa sii dhalaali anigaa dhigayee, Dhalaal Caliyeey dhankaa ka mareey´´.*

21. Nin farro madhani fariid maaha

Laba nin oo ilma adeer ahaa oo wada degganaa magaalada Xarshin (Deegaanka Ismaamulka Soomaalida Itoobiya) ayaa midi ahaa nin ragannimo lagu tuhmo, halka ka kale aanu beesha u tirsanayn. Haddaba ninkii liidnimada lagu tilmaamayey ayaa waxa uu bilaabay ka ganacsiga qaadka isagoo magaalada Jigjiga dameer qaadka kaga soo qaadi jiray. Muddo kooban ayuu ku macaashay. Halka uu dameer kaliya ka keeni jiray waxa uu gaadhay heer uu saddex dameer ku keeno, waxa aanuu dhistay laba dergadood oo waa weyn. Farihii dufan leh baa wax duuga ayey Soomaalidu ku maahmaahdaaye ninkii waxa uu noqday nin aad loo qadariyo oo reerkii uu ka dhashay magac ku leh, halka ninkii geesiga ahaa oo wakhtigu ciilay aanay cidiba tirsan hadda. Waxa ay sidii ahaataba ninkii geesinnimada lagu tirinayay oo iska busaaradsan ayaa maalin taakulo waydiistay ninkii kale, nasiibdarrose waa uu ku hungoobay oo waxba ka muu helin, isagoo cadhaysan ayuuna u gabyay, wuxuuna yidhi:

Saaciidadu dameer iyo,

Doqon iyo nin liitiyo,

Dergadahay u jeceshay.

22. **Beeni raad ma leh**

Nin geeljire ah ayaa u yimid rag kale oo ardaa fadhiya oo ay isku beel ahaayeen. Markii cabbaar la sheekaystay ayaa ninkii geeljiraha ahaa nimankii kale ku yidhi, `` Waxaan *maanta soo arkay wan badhi weyn oo badhidiisu buurtaas leegtahay.´´* Nimankii oo u qaadan waayay hadalkii ninka ayaa mid ka mid ahaa raggii oo ninka geeljiraha ahaa ku yaqaanay inuu beenta sheego ayaa yidhi, `` *Anna waxa aan maanta soo arkay dheri weyn oo ay 100 nin gudaheeda dhaqayaan. ´´* Ninkii geeljiraha ahaa oo la yaabay sheekadan kale ee uu ninka kale keenay ayaa markiiba su'aalay, `` *Oo tallow dherigaa weyn maxaa lagu kariyaa*?´´ Ninkii oo raba in uu geeljiraha u tuso inuu been sheegayo ayaa ku yidhi, `` *Waxa lagu kariyaa wankaa badhida weyn ee aad sheegayso.´´*

23. **Naa soo baxa oo nala ciyaara**

Nin geel jire ah ayaa waxa uu maalin meel wado ah ka helay kartoon uu ku jiro khamri badan oo ka dhacay gaadhi ay wateen askartii guumaystaha Ingiriisku. Waligii hore umuu arag kartoonkaas oo kale'e waa uu furay dhan walbana ka eegay haddana ursaday. Khamrigu waxa uu u urayay sidii dawo oo kale. Ninkii reer miyiga ahaa waxa uu u qaatay inuu kartoonkuba yahay dawo maaddaama uu sidii dawadii magaalada oo kale u urayo. Isagoo tunka ku sita ayaa waxa uu la yimid reerkii. Waxa uu qorshaystay in uu marka hore dawada ku tijaabiyo islaan ayaydii ahayd oo da'da xanuun u raacay.

Goor fiida ayuu islaantii ugu soo galay buulkii ay jiiftay, waxaanuu ugu bishaareeyay in uu u wado dawadii ay ku caafimaadaysay. Islaantii oo iska tabcaana ayaa inta uu quraaradii furay siiyay labba fur mugood.

Markii sidaa uun xoolihii loo lisay ayaa islaantii oo dhowr sannaba dhulka taalay inta ay soo booday dhexdana maro ku soo xidhatay banaankii reerka u baxday ciyaarna qabsatay, iyadoo kor u hadlaysana leh, ``` *Naa soo baxa oo nala ciyaara*.´´

Reerkii ayaa waxay u qaadan waayeen islaantii da' da ahayd oo caawa sacab tumanaysa. Waxa la waydiiyay ninkii islaanta waxa uu caawa siiyay, waxaanuu u sheegay inuu siiyay dawadii cimriga yaraynaysay.

Beeshii oo dhan baa isku soo baxday, qofkastaana waxa uu ninkii ka codsaday inuu isna dawada siiyo, waxaanu ninkii u sheegay inay dawadani qaali tahay oo cimriga bini-aadamka yaraynayso sidaa darteedna uu furkiiba siinayo hal neef oo adhiya.

24. Talow kolba ma mid buu subkay?

Nin xoolo dhaqato ah, oo Alle duunyo badan siiyay aya habeen isaga oo safar ah u soo dhaxay reer reer miyi ah. Waa la soo dhaweeyay oo ardaagii baa darmo weyn loo dhigay. Goor cawayskii ah ayaa loo keenay xeedho garow ah oo subag lo'aad oo aan badnayn lagu daray. Nin xoolo badnaa oo subag iyo caano ku noolaa buu ahaaye, isaga oo saluugsan sida subagga garowga loogu yareeyay buu yidhi, `` *Awoowgaa la gub! Talow kolba ma mid buu subkay*?´´

25. Raadiyihii la gubay

Wakhti ku beegan horaantii qarnigii labaatanaad ayaa qolo reer miyi ahi meel waddo ah ka heleen raadiye. Raadiyuhu wuu shidnaa oo war baa ka baxayey markaasi. Waxa ay la yaabeen aaladdan aaney hore u arag. Inta ay qaateen ayay la tageen reerihii. Markii xoolihii

la soo hooyay ayaa cirroole iyo carruurba laysku soo baxay si loo daawado raadiyihii, culimadii oo dhana waa layskugu yeedhay. Dhowr neef inta la qalay oo Alle bari la sameeyay ayaa isla meeshii lagu gubay raadiyihii.

26. Anigu ninkii waan iskaga imi, waayo dhabar buu cunay

Dhaqankii hore ee Soomaalidu waxa uu ahaa mid qiimo badan ku fadhiyay, ragga iyo dumarkana waxay ahaayeen kuwo nolosha ay bulshada ku leeyihiin u kala qaybsanayd. Haddaba gabadh bil uun aroos ahayd ayaa iyada oo reerku ducaystay waxa ay aragtay saygeedii oo inta uu hilbihii kale iska daayay hilib dhabar u badan cunaya. Inta ay yaabtay oo ay u qaadan wayday ninka dhabarka cunaya ayay halkii ka soo jarmaaday oo ay timi reerkoodii. Markii ay reerkoodii timi ayaa hooyadeed waydiisay waxa reerkeedii ka keenay. Halkii jawaab kale laga sugayey ayuunbaa ay tidhi, `` *Anigu ninkii waan iskaga imi, waayo dhabar buu cunay.´´*

27. Maxay ka nuugtaa amase ku nuugtaa?

Waraabe ayaa beri soo dacwooday, waxaanu sheegay in sumcad xun laga aaminsan yahay oo xan iyo war aan jirin laga faafiyay. Waxa uu sheegay in aan aqoon fiican loo lahayn ee uu ka duwan yahay sida loo haysto ee ah in aanuu ammaanada ku fiicnayn.

Markii ay habar dugaag dhegaysteen, ayay go'aan ku gaadheen in waraabaha laga daayo eedeynta, isla markaasna loola dhaqmo sida xawayaanka intiisa kale loola dhaqmo, laakiinse horta la tijaabiyo. Waxaa lagu yidhi Waraabe `` *Waraaboow hadalkaagu waa daw, xaqna waad u leedahay in lagu aamino, balse waa la hubsan dooneeye, ka bilow hawsha aad sumcaddaada ku hagaajinaysid*

ilaalinta hashan iyo nirigteeda yar ee ay dhashay, ma laguugu yimid iyagoo bedqaba, mise sida la sheegayo waxyeelo u geysatay hashaas iyo nirigteeda. Haddii laguugu yimaaddo, iyagoo bed qaba, waxaa xitaa lagaa beddali doonaa magaca, waxaana laguu bixinayaa "Amiin." Laakiin haddii loo yimaaddo adigoo hashii iyo nirigteedi yarayd waxyeelo u geystay magacaa waraabe lagaa dayn maayo.

Waraabe oo isku kalsooni ka muuqato ayaa u xaqiijiyey in uu yahay mid aamin ah oo wixii lagu aamino loogu imanaayo. Markii laga tegay ayuu Waraabe wuxuu is adkeeyaba is hayn kari waayay, wuxuuna goostay in aanu ku fogaanin hasha iyo nirigteeda ee uu raadiyo hab waxna uu ku yara cuno oo aanay cidna dareemin, waxaanu ku tashaday inuu hasha ka goosto afarta naas oo keli ah, waanu ka goostay. Cabbaar kadib ayaa haddana uu gaajooday waxaanu nirigtii ka goostay labadii faruuryood.
Maalintii danbe ayaa waraabihii loo yimid, waxaana lagu farxay in hashii iyo nirigteedii oo nabada uu hayo, waxaana loo soo jeediyay ammaan fara badan. Goor fiidkii ah ayaa la damcay in hashii la liso. Markii gaawihii loo soo qaatay ayay hashii godlan wayday, ninkii hasha lis islahaa oo yaaban ayuu waraabe la hadloo ku yidhi `` *Maxay ka nuugtaa amase ku nuugtaa?´´ Halkii baa waraabe khaayinimadii ku caddaatay.*

28. Biciidka aan dili doono

Nin ugaadhsade ahaa oo inta badan soo ugaadhsan jiray duurjoogta ay ka midka yihiin, Biciidka, Deerada, Garanuugta , Gorayada, Cawl iyo Sakaarada ayaa aroor isagoo leebkiyo qaansadii qaatay oo ugaadhsi tagaya ayaa uu la sheekaystay afadiisii oo uur lahayd. Waxa ay ahaayeen lammaane is jecele isagoo niyada u dhisaya

waxa uu ku yidhi, `` *Biciidka aan dili doono, yeesha aan ka jari doono, lacagta layga siisan doono, sabeenta aan ka soo iibin doono, sumalka ay dhali doonto, subaga badhidiisa laga shiili doono ayaad cabbi doontaa."*

29. Geeddi iyo Caanihii

Geeddi oo ahaa nin inan la yaal ah ayaa beri reerkiisii iyo reerkii ay xiddidka ahaayeenba geedi galeen. Geedigii waxay ku jiraanba goor ay casar tahay ayaa ninkii Geedi gaajo ba'ani qabatay, waxa uu hoggaaminayay awrtii saabaanku ku rarnaaye, inta uu joojiyay ayuu mid ka mid ah awrtii fadhiisiyay si uu dhiil saarnayd caano uga cabbo. Markii uu dhiishii furtay ayaa neyl yar oo awrka saarnayd ku soo dhacday oo ay lugihii la gashay caanihii. Geeddi ayaa inta uu neyshii qabtay ayuu ka leefay caanihii. Intii uu neysha leefleefayey ayaa soddohdii soo gaadhay kuna tidhi, `` *Waar Geeddi maxaa kugu dhacay?´´* Inta uu wali hawshiisii iska sii watay ayuu ugu jawaabay,`` *Canabeey ma caanahaa aan arkayaan cidlo kaga tagaa.´´*

30. Ee Xaaji dee kaalay aynu Gaaladii laynee

Oday weyn oo duunyo badan Ilaahay siiyay ayaa beri xaaskiisii ka dhimatay. Sidii dhaqanku ahaa waxa reerkii ay xiddidka ahaayeen siiyeen oo ay xigsiisan uga dhigeen odaygii inantii gabadha ka yarayd oo 12 jir ahayd. Maaddaama oo ay inantu aad u yarayd, odaygii waxa uu gartay in aanuu naagnimo u doonan oo uu u daayo uun hawsha reerka. Markii ay dhawr sanno ka soo wareegtay ee gabadhiina kortay ayaa odaygii damcay inuu muraadkii dumarnimo ula tago, waxaanu keenay fikradii uu hawshaa ugu soo bandhigi

lahaa. Goor fiida ayuu u yeedhay waxaanu ku yidhi, `` *Markasta oo aynu isku tagno waxaynu dilaynaa toban gaal, markaa si aynu ajar badan u shaqaysano waa inaynu isku galmoonaa*.´´ Gabadhii yarayd oo aan xaajo rageed aqoon ayaa aad u soo dhawaysay in ay gaalo laayaan maaddaama oo ay ajar badan ka helayaan, sidiibaanay ku aqbashay odaygiina muraadkiisii u gutay. Muddo waxa ay sidii ku socotaba, oo odaygii da' dii ku soo baxdaba, maalin kale ayaa odaygii oo rag kale ardaaga kula cawaynaya gabadhii yarayd u yeedhay. Markii uu u yimi ayey ku tidhi, `` *Ee Xaaji dee kaalay aynu Gaaladii laynee*?´´ Odaygu wuu daalay oo iskama uusan celin karayn gabadha yare waxa uu ugu jawaabay, `` *Naa orod naga tag, gaaladaa aad sheegaysid Sayid Cabdalle Xasan baa dhamayn waaye.´´*

31. Xaji Caydiidoow anna Alle lihi, adna iga eed li'id

Caydiid iyo Ceebla waxa ay ahaayeen lammaane is jecel, muddo dheerna wada joogay, nasiibdarrose aanu wax ubad ah Ilaahay kala siinnin. Ceebla oo ogayd sida weyn ee odaygeedu u jecel yahay ee uu mar walba ugu hagar baxo ayaa maalin danbe waxa ay go'aan ku gaadhay in ay odaygeeda u fasaxdo inuu gabadh kale guursado, si uu ubad u helo. Goor fiida markii uu Caydiid salaaddii Maqrib tukaday ayaa Ceebli u yeedhay, markii uu u yimidna waxa ay ku tidhi, `` *Xaji Caydiidoow anna Alle lihi, adna iga eed li'id.´´* Halkii buu odaygii gabadh kale ku guursaday.

32. Calool adayga ayaa guusha horseeda

Nin ku caan baxay geesinnimo, ayaa maalin waxa laga codsaday in uu sheego sababta uu kaga guuleysto ragga marka dagaalku dhaco. Waxa uu geesigii ku yidhi ninkii reer miyiga ahaa ee su'aasha

weydiiyey fartaada afkayga dhexgeli. Ninkii reer miyiga ahaa sidii uu ku amray geesigii ayuu sameeyey, geesigiina fartiisii ayuu u dhiibay reer miyigii oo ku yidhi qaniin, dabadeed reer miyigii wuxuu aad u qaniinay fartii geesiga, geesigiina wuxuu qaniinay fartii ninkii reer miyiga ah. Waqti yar kadib waxa aad u cabaaday oo ka codsaday geesigii inuu ka qaboojiyo qaniinyada reer miyiga. Dabadeed geesigii wuxuu reer miyigii ku yidhi, ´´ *ma garatay waxaan ragga kaga adkaado*? Reer miyigii wuxuu ku jawaabay, ´´*maya maan garan*´´. Geesigii wuxuu ugu jawaabay"*marka ragga aan la dagaallamayo ama aan ku jiro fagaaraha dagaalka in yar ayaan calool adaygaa oo ii horseeda inaan marka dambe guuleysto."*

33. Tuugtii beerta u dhacday

Saddex nin ayaa waxa ay caadeysteen in ay xadaan beer khudrad badani ka bixi jirtay. Ninkii beerta lahaa ayaa ogaaday in beerta la gurto maalin kasta. Maalin danbe ayaa waxa uu la kulmay tuugadii oo beertiisii ku dhexjirta, waxa aanuu kadinkii beerta la fadhiistay qorigiisii. Waxyar kadibna waxa beertii ka soo baxay tuugtii oo inta ay soo dhargeen haddana nin waliba wixii uu qaadan karayay gacanta ku sita. Inta uu qorigii cabaystay oo uu istaajiyay ayuu ku yidhi, `` *Waar tuugayahay beertayda dhameeyay beerka dhulka saara, ninkastoowna waxaad gacanta ku wadatid dabada iska geli.*´´ Tuugtii oo naxdin gariiraysa, oo ay talo ku caddaatay ayaa kii ugu horreeyay oo watay xabbad tamaandho ahi inta uu dabada iska geliyay cagaha wax ka dayay. Kii labaad oo watay xabbad liin bambeeno ah ayaa inta uu foorarsaday ayaa haddana inta uu kor u eegay ninkii beerta lahaa qosol ku dhuftay. Ninkii beerta lahaa oo qorigii gacanta ku haysta ayaa ku yidhi, `` *Waar maxaad ku qoslaysaa*?´´ Inta uu qosolkiisii sii watay ayaa uu ugu jawaabay, `` *Anigoo liin bambeelmadan aan wato la yaaban ayaan arkay haddana saaxiibkayga iga danbeeya ee xabxabka wata.*´´

34. Waxa lagu goblamay waa tii gadhka lahayde

Nin maanso yahan ahaa oo jaajaalenimo lagu yaqaanney ayaa beri u yimi qolo ay geeri ku dhacday oo wiilkoodii curad wadkii helay. Markii geeridii loo sheegay ayaa halkii uu tiiraanyo muujin lahaa waxa uu meriyay afarleydan gaaban, isaga oo ka waramaya isba dhibaatada haysata oo ah in xoolihii ka baaba'een, adhigiisiina noqday qaar xanuun u dhintay iyo qaar ildaranba, waxaanu ku jawaabay:

Adduunyada dhibaatiyo,

Naxdini kama dhamaadaane,

Anaba midbaa dhicisay,

Oo neef ka soo dhacaye,

Ridii Garo, ridii Geeso kala jeexan,

Mar aan soo dhex maray,

Garana way dhogor madoobayde,

Waxa lagu goblamay

Waa tii gadhka lahayde.

35 .Cambaro iyo Odaygeedii

Qoys reer miyiya ayaa waxaa aradkay deganaayeen isla hal toddobaad kaga dhintay labadii wiil ee reerka u weynaa. Ka dib waxa ay reerkii go'aan ku gaadheen inay isaga guuraan raaskii ay deganaayeen, una digo rogtaan meel kale, iyagoo u arkay inaanay meeshani u qaalibnayn. Markii ay meesha cusub soo degeen ayaa waxaa markasta u imanayay dadkii ay beesha wada daganaayeen, si ay ugu tacsiyadeeyaan reerka. Qof kastoo reerka soo booqdaana waxa uu ku yidhaa, `` *Allihii lahaabaa qaataye iska samra´´.*

Maadaama oo ay meel barwaaqo ah soo dageen, odaygii reerku waxa uu jeclaystay inay iska ducaystaan oo ilaahay u shukriyaan. Goor fiid ah ayuu islaantiisii u yeedhay, waxaanu ku yidhi, `` *Naa Cambarooy wax ina soo marayba waynagan hadda iska nimcaysane waa inaynu ducaysanaa oo Ilaahay xusnaa´´* . Cambaro ayaa inta ay soo booday ku hadashay erey Alla koodnimo ah, waxaanay odaygii ku tidhi `` *Illaahay waa kee ma kii Afcad iga helay ´´*.

Waa maalmo duniduyoo

Maal-qabeenka faaniyo

Miskiinkiyo faqiirkaba

Mawlahaa arsaaqoo

Isagay u magan yiin

Macaankeeda noloshana

Maal lahaanshihiisiyo

Maaha Doolar haysee

Farxad baa u mudan kow

Qosolna waa macaan yoo
Malyuun kuuma goysee

Sheekooyin maadiyo

Murti aad u wacaniyo

Madadaalo guud baan

Maanta kuu wadaaye

Darka Maadda iga hoo

Qoraha Buugga: Muuse Dalmar

QAYBTA 2AAD

Sheekooyin murtiyeed qosol badan oo ka dhacay magaalooyinka

1. Waa layna cadaabayaa

Markii uu socday dagaalkii 1977-kii ee u dhexeeyay Soomaaliya iyo Itoobiya ayaa rag badan oo dhaawac ah waxa la keenay dhakhtarka Hargeysa. Nin geeljire ah oo isagoo geelisii la jooga uun qiiro wadaninnimo qaaday oo dhaawaca ka mid ahaa, ayaa markii uu laba cisho miyir la'aa waxa uu soo miiraabay maalintii saddexaad. Waxa uu ku baraarugay uun isaga oo jiifa waadh dadku ay wada xidhan yihiin dhar cad, qof kastaana kurka mooyee inta kale oo dhammi dedan tahay. In yar ka dib waxaa waadhkii soo galay nin caddaana iyo laba kalkaaliso oo daba socda, shaqadooduna tahay inay ogaadaan dadka dhaawaca ah xaaladdooda caafimaad. Ninkii geeljiraha ahaa oo amakaagsan, isla markaana garan waayey halka uu joogo ayaa waxa uu waydiiyay nin dhinaciisa jiifay, ``*Waar xagaynu joognaa´´*? Ninkii oo gartay inuu ninku badow yahay, horena aanu dhakhtarkan oo kale u arag ayaa ugu jawaabay, ``*Aakhiraynu joognaa´´*. Ninkii reer miyiga ahaa oo yaaban ayaa haddana su'aalay, ``*Oo ninkan cad iyo naaguhuna maxay ahaayeen´´*? `` *Waar waa Munkar iyo Nakiir oo su'aalihii innaga qoraya´´*.Ninkii reer miyiga ahaa oo talo ku ciirtay oo aaminay in uu aakhiro joogo ayaa waxaa soo dul istaagay dhakhtarkii iyo labadii kalkaaliso. Markii ay salaameenba waxa uu ugu jawaabay. `` *Allahay waa Alle, Nabigay waa Maxamed, diintayna waa Furqaan*. Kalkaalisadii oo yaaban ayaa ninkii cadaa u turjuntay, waxaanay u qaateen in xanuunku madax maray. Intay

warqad cad oo dawaduu u baahnaa ku qoran tahay ku dul dhajiyeen ayay sii dhaafeen.

"*Oo aniga maxay ii qoreen*" buu weydiiyey.
"*Cadaabta*" ayuu ugu jawaabay. Cabbaar ka dib waxa uu ninkii reer miyiga ahaa daaqada dibadda ka arkay gaadhi iska-rogo ah oo xaabo ku rogaysa waadhka dabadiisa. Inta uu yaabay ayuu ninkii ku xigay haddana waydiiyay, `` *Waar xaabadanna maxay ahayd?´´* Ninkii ayaa ugu jawaabay, ``*Xaabadani waa tii laynagu cadaabayay.´´* Ninkii reer miyiga ahaa oo aad moodo inaanay xitaa waligii qodoxi mudin ayaa albaabkii orod kaga baxay, isaga oo ku sii tiraabaya "*Allah waa og yahay anigu cadaab ma gayo! Ma gayo."*

2. Joon iyo Sigaarkii

Joon waxa uu ahaa sarkaal sare oo u shaqeeya hay'adda Qaramada Midoobay ee Soomaaliya. Waxaa uu ahaa nin magaalada uu deggan yahay aad looga yaqaanno oo inta badan gaadhigiisa ku dhex mara. Maalin isagoo faras magaalaha maraya ayaa waxa u yimi laba nin oo tuuga ah waxaanay damceen inay ka xadaan shandad u saarnayd gaadhiga shidhkiisa.Labadii nin mid baa inta uu sigaar la soo baxay waxa uu soo hor istaagay gaadhigii uu Joon watay, waxaanu sigaarkii saaray gaadhiga ishiisii casayd ee laydhka isagoo isku dayaya inuu sigaarka ka shito. Joon oo la yaaban waxa uu ninku samaynayo ayaa gaadhigii ka soo degay si uu ula hadlo. Joon waxa uu ninkii u sheegay laydhka cas in aanu dab nool lahayn, balse intii ay wada hadlayeen waxa waydaartay tuuggii kale oo haf la yidhi shandadii shidhka dhex qotontay. Joon markii uu gaadhigii ku soo laabtay waxa uu gartay in la dagay, waxana uu ku guuxayey "*Ileyn dabku gaadhiga shidhkiisa ayuu ka shidnaa".*

3. Qoladii xalay farduhu jiidheen baan ku jiray

Markii laga furay Hargeysa Shineemadii ugu horraysay, oo dadkuna aad u xiisaynayeen, bal in ay arkaan Sinimooga cusub waxa ka socda, ayaa nin aan isagu wax fikir ahba ka haysan fililimka. Balse maqlay in ay Aflaantu aad u xiise badanyihiin, markii ugu horaysay galay Sinimihii u horeeyay ee Hargeysa laga furo. Waxay ahayd maalintii ugu horaysay ee uu shaneemo galo'e, waxa uu soo goostay tigidhkii, wuxuuna soo galay gudihii Sinimaha. Waxaa Shaneemada ka socday filim fardo lagu dagaalamayo'e (Cow Boy) waxa uu la kulmay uun iyadoo dagaalku meel qadhaadh marayo, fardihii soo yaacayayna waxa uu mooday inay yihiin kuwo nool oo dhab ah una soo fadlaynaya dhankiisa. Naftu orodbay kugu aamintaaye, markaliya ayuu dadkii filimka daawanayay jiidhay, wax uu kuraastii iyo dadkiiba dulmaraba waxa uu ka jabay lug.

Halkii baa isaga oo dhaawaca loo qaaday cusbitaalka. Maalintii labaad ayaa ninkii oo dhaawaca oo laba birood ku boodaya waxa la kulmay rag ay saaxiibo ahaayeen. Markii ay arkeen inuu dhaawac yahay ayay waydiiyeen waxa ku dhacay. Isagoo wali u haysta in shilkii xalay ku dhacay lala qabo ayuu ugu jawaabay, `` *Waar waxaan ku jiray qoladii xalay farduhu jiidheen*``.

4. Suurad hadiyad ah

Xilli ku beegan badhtamahii qarnigii 20-aad ayaa nin reer magaal ahi waxa uu magaalada Cadan ee waddanka Yemen ka soo guursaday gabadh Soomaaliyad ah, laakiinse ku dhalatay dalka

Yemen. Waxaa uu ku la aqal galay magaalo ka mid ah waddanka Soomaaliya. Aroosaddii waxaa Cadan ka soo raacday Faadumo oo minxiisad u ahayd. Faaduma waxaa ay is barteen Cabdillaahi oo isna ahaa minxiiska. Faaduma maalintii ay berri oo kale dhoofayso ayaa waxay

Cabdillaahi u sheegtay in ay uga tegi doonto Suurad hadiyad ah.Cabdillaahi waxa uu la yaabay Suuradan ay sheegayso Faadumo ileen waxa uu maqli jiray uun Suurad Quraan ah'e. Waxa uu sugoba galabtii ayay u keentay hadiyad warqad ku shaqlan oo aad u qurux badan. Cabdillaahi waxa uu u haystay Suurad Quraan ah waana ka guddoomay isagoo aad u dhawrayana waxa uu dhigay meel aad u xafidan.

Cabdillaahi habeenkii oo dhan waa is miranayey, hurdana waa kala tageen isagoo isku canaananaya sida hawsha yar ee Faaduma ku ambabaxday. Waxa uu dawo ka raadiyey in uu akhristo Quraankii hadiyadda loogu keenay si uu ugu gamo'. Cabdillaahi markii uu daahfuray hadiyaddii oo shaqalka ka gooyey waxa kaga soo baxay sawirkii Faaduma oo Ilaahay bilic iyo bili u dhammeeyey. Markaas isaga oo qoslaya ayuu ku hubsaday barkinta hoosteeda oo si hawl yar u leday.

Cabdillaahi oo ku welfay in uu wehel ka dhigto sawirka Faaduma ayaa maalintii danbe sawirkii ku illoobay sariirta korkeeda. Waxaa gurigii u soo waydaartay Cumar oo ay saaxiib ahaayeen oo sariirtii isku tuuray.

Cabdillaahi markii uu guriga ku soo noqday waxa uu ku naxay Cumar oo kor galgalanayaa sawirkii Faaduma. Isla markiiba jeedal sibitoor ah oo uu gacanta ku hayey ayuu diirka kaga siibay. Cumar oo baraad la' oo ku gacan adeygaya in aan macawistu ka dhicin ayaa kadinka weydaartay isaga oo ganafka ku sii dhuftay dhowr haween ah iyo caruur ay Cabdillaahi guriga wada geli jireen.

Arrintii farahay ka baxday, gogol baa la fidiyey waxaana Cabdillaahi lagu eedeeyey in uu saaxiibkii ku hor ceebeeyey haween iyo carruur hortooda. Maalintii ay odayaashii labada dhinac gogoshii iskugu yimaaddeen ayaa nin ay labada ninba saaxiib

ahaayeen oo Daahir Dheere la odhan jiray dhegta ugu sheegay odayaashii ka socday dhanka Cumar inuu Cumar isagu fal xun ku dhaqaaqay, gabadh marwo ahna la seexday. Wuxuna uga digay in aan iyaga xaal loo raacin. Odayaashii oo hadalkii Daahir ku qancay ayaa gogosha ka ruqaansaday waxaana ay ku dardaarmeen, ``*Arrintu waa arrin dhallinyarro, faro geeljirena hoos baa loo dhaqaa, markaa arrinka aynu Daahir Dheere iyo dhallinyarrada u dayno.´´* Xagiibay labaddii dhinacba arrinkii u xilsaareen Daahir Dheere.

5. Buudhigii la kireeyay

Berri baa qolo safar ah waxay xoolo keeneen magaalada. Markii ay xoolihii iibiyeen oo ay soo dhammaysteen wixii muraad ahaa ee ay magaalada uga baahnaayeen ayaa waxa ay u xamaan xidhxidheen sidii ay reerahoodii ugu noqon lahaayeen. Qawdhan oo gawaadhida miyiga u baxda inta badan dadka ka kireeya ayaa waxa uu qoladii safarka ahayd u sheegay in uu u hayo gaadhi aad u fiican si degdeg ahna reerahoodii u gayn doona.

Safarkii waxa ay raaceen kaarigii Qawdhan. Waxa uu wadoba iyaga iyo alaabadii ay siteen waxa uu ku hubsaday buudhi meel cidlo ah yaala. Waxaa uu u sheegay in gaadhigu uu muddo yar ka dib bixi doono. Inta uu lacagtii nooliga ka ursaday ayuu halkii kaga tagay. Nin la sugayoow adna yaad sugi, waxay saarnaadaanba gabbalkii baa ugu dhacay cid u soo socotana hadalkeedaba daa. Shacabkii magaalada deganaa ayaa goor fiid ah arkay dadka buudhiga saaran. Inta ay la yaabeen ayay ku yidhaahdeen, ``*Waar meesha isaga soo dega waa buudhi aan meelna u socone*``.

6. Xalwo ma qabtaa?

Markii maamulkii Kacaanku qabsaday xukunkii jamhuuriyaddii Soomaaliyeed, waxaa meel maray isdhexgalka bulshada taasoo dhalisay is fahan-darro, hase ahaatee, markii danbe dadku waa isu garaabeen. Askarta iyo macallimiinta ayaa inta badan laga beddeli jiray gobollada ay u dhasheen si ay uga soo shaqeeyaan deegaamada kale. Haddaba nin askari ah oo laga soo bedalay goboladdii koonfureed ayaa waxa uu shaqo ka bilaabay goboladdii waqooyiga. Maalin ayaa isaga oo suuqa jooga waxa uu damcay in uu xalwad iibsado. Ninkii xalwadda iibinayey ayuu weydiiyey ``*Xalwo ma qabtaa*?´´ Ninkii xalwadda iibinayay xaaskiisa ayaa la odhan jiray Xalwo, markaa waxa uu u qaatay inuu xaaskiisa waydiinayo, waxaanay xaaskiisu ahayd ganacsato, ka dhex shaqaysata gobolada waddanka.``*Haa waan qabaaye maxaa adiga ku baray´´*? Askarigii oo u jawaabaya ayaa ku yidhi, `` *Xamarbaan ku dhuuqdhuuqi jiray nooh´´* ileen waa runtiiyoo xalwadda waligiiba wuu cuni jiraye, ninkii xalwadda iibinayay oo xanaaqsan ayaa inta uu feedh qaaday daan kastaba jabiyey.

7. Midhba kuma hadhin

Markii ay burburtay dawladdii Soomaaliya, waxay Soomaali badani qaxoonti ka noqdeen waddanka Itoobiya. Haddaba Islaan caanoley ah oo ka mid ahayd dadka ku jiray xeradii qaxoontiga ee Dulcad, ayaa goor fiida iyada oo sidata laba joog oo caano ah, waxaa meel yar oo gaaban kaga soo baxay askari Itoobiyaana waxaanu ku yidhi, ``*Qushbal ´´* oo micnaheedu noqonayso fadhiiso. Islaantii waxay u qaadatay inuu leeyahay qub caanaha, isla markiibana labaddii joogba afkay dhulka u galisay.

Inta uu ninkii askariga ahaa yaabay ayuu ku yidhi islaantii, ``*Midhinow*?´´ oo micnaheedu yahay waa sidee. Islaantii oo naxsan, una qaadatay inuu leeyahay madhi joogga, ayaa ugu jawaabtay `` *Midhba kuma hadhin´´*.

8. Adeer shimbir ayaan soo raacay

Wiil Soomaaliyeed oo ku dhashay waddanka Kiiniya ayaa waxa uu yimi magaalada Boosaaso. Isla markiiba waxaa soo booqday adeerkii oo magaalada ku sugnaa. Odaygii waxaa uu warsaday gaadiidka inanku la socday. Wiilkii oo is huba ayaa ugu jawaabay, `` *Adeer shimbir ayaan soo raacay.´´* Odaygii yaab oo hareerihiisa ayuu ka eegay wax u kala afqaada. Se mar danbe waxa uu ogaaday Inanku in uu soo minguuriyey afka Sawaaxiliga oo diyaaradda loo yaqaanno shimbir.

9. Waayahay hooyo, waa duco qabe kani

Safiya waxay ahayd reer magaal, ehelkoodu badi waxay ahaayeen kuwo noloshoodu ku tiirsan tahay miyiga, sidaasi daraadeed had iyo jeer marka ay magaalada u soo dhaadhacaan waxay ku soo dagi jireen gurigooda, ilaa inta ay reerahoodii ku noqonayaan.

Haddaba Safiya iyadoo jecel inay soo dhawayso qaraabadeedan miyiga ka timid ayay haddana mararka qaar ka qashaafi jirtay muuqaalkooda iyo darxumada ka muuqata iyadoo is odhan jirtay dhallinyarada xaafadda ayaa kugu caayi. Waxay markasta dadka gurigooda ku soo daga u sheegi jirtay inay is maydhmaydhaan, dhar bilic lehna xidhaan inta ay magaalada joogaan. Lexojeclo laba nin kama wada qoslisee qoladan reer miyiga ahi xarago way is daayeen waxay ka fikirayaana waa baahiyihii kale ee daruuriga ahaa iyo siday u iibsan lahaayeen wax ay quutaan.

Safiya markii ay ugu taag wayday inay xarragoodaan, ayay maalin danbe u fikirtay, waxaanay u tagtay wiil ay isku iskuul ahaayeen, ugana sheekaysay sheekadii. Waxaanay ka codsatay inuu soo xidho dharkii cad cadaa ee dhakhaatiirta, laba irbadood iyo mishiin yarna soo qaato kadibna uu guriga ugu yimaaddo, iyana ay albaabka ka furi doonto, markaasna uu yidhaahdo maanta waa maalintii ololaha nadaafadda oo waxa la baadhayaa ruuxii bilic xun ee xaafadda jooga. Sidii baanay wiilkii Safiya ku balameen.

Waxay timid gurigii, waxaanay islaamihii ku tidhi, ``*Miyaad maqasheen in dawladdii maanta bilowday olole nadaafadeed kaasi oo ilaa aqalada lagu baadhayo qofkii bilic xunna la qaban doono?´´*

Islaamihii oo yaaban ayaa ugu jawaabay, `` *Maya hooyee, siday wax u jiraan*?´´

``*Dhakhaatiirbaa maanta xaafadaha baadhaysa qofkii bilic xunna waa la xidhayaa, ee hooya dharkan qurxoon oo iska badala calaladan aad ku maran tihiin´´* .

Islaamihii oo naxsan dhanna uga ducaynaya ayaa markiiba intay maydh maydheen dharkii cusbaa isku taagay. Dr Cabdi oo qalabkiisii sita ayaa albaabkii dibadda soo garaacay, markii laga furayna waxa uu soo galay gurigii. Waxa uu u sheegay in uu maanta jiro olole nadaafadeed. Labadii islaamood oo aad yaabto siday u labisan yihiin oo aad moodo inay caruusado yihiin ayuu Dr Cabdi qolkii ugu soo galay.

Inta uu sidaa u eegay ayuu ku yidhi, `` V*ery Good , waad ka soo baxdeen waajibkiinii, ee sidaa ugu wada, toddobaad kastana waan idin kormeeri doonaa´´. ``Waayahay hooyo, waa duco qabe kani´´.*

10. Alla dhanaanaa, kani waaba mid halis ah

Gabadh yar oo reer magaal ah ayaa beri waxaa xaafadooda u soo hoyatay habaryarteed oo miyiga ka timi. Goor ay saqdii dhexe tahay ayay islaantii madax xanuun saayida dareentay . Waxay u yeedhay Safiya una sheegtay inay u baahan tahay kiniinkii madaxa.

Maadaama ay magaaladu xidhnayd , oo meel kiniin laga soo iibiyaa aanay jirin, habaryarteedna ay xanuunsanayso, Safiya fikir fiican ayay keentay. Inta ay kijadii gashay ayay baaldigii qooshka ka soo goysay qooshkii hareeraha kaga dhaganaa, kadibna intay sidii kiniinka oo kale u soo duuduubtay ayay laba xabo iyo koob biyo ah u keentay islaantii. Halkii baanay islaantii ku liqday kiniinkii.

``*Alla dhanaanaa, kani waaba mid halis ah, ducaan kugu ogahay habaryar, weynoow´´*. Sidaasi waxaa tidhi Maryan oo intay bustihii hoosta ka gashay isku duuduubtay.

Nasiib wanaag Ilaahay wuu ku caafiyay, ileen dawo ahaanbay u niyaysee.

11 . Suuqa Xamar Weyne

Mar ay dawladdii Kacaanku la dagaalamaysay alaabaha koontarabaanka ah ayaa waxaa niman CID ah oo halis ah laga soo badalay goboladda waqooyiga loona soo badalay Muqdisho.

Waxay shaqadoodii ka bilaabeen suuqa weyn ee Xamar Weyne, waxayna inta badan ku labisan jireen go' yaal shaal ah, macawiso iyo bakoorado. Waxaanay maalintii dhex socon jireen suuqa Xamar Weyne si ay u xakameeyaan badeecadaha aan sharciga ahayn. Haddaba maalin ayaa waxa ay soo garab istaageen laba nin oo reer Xamara waxna kala iibsanaya, qolodii CID inta ay sigaar shiteen ayay soo ag istaageen si ay u dhagadhageeyaan. Nimankii reer Xamarka ahaa ayaa markiiba fahmay inay raggani yihiin kuwii dawladda u shaqaynayay, markiibana sheekadoodii ganacsiga ahayd ayay badaleen waxaanu kii u horreeyay hadalkii ku bilaabay .

``Haye waar maxaad rabtaa´´?
``Adaan ku rabaaye iga kiree maanta´´.

``Oo imisaad igu rabtaa´´?

``100 Shillin´´.

Nimankii CID ahaa oo fajacsan ayaa meeshii isaga cararay inay shaqo qabtaanba iska daayoo.

12. Wuu roori, uu kadaba roori, beeroow balaayo qabe

Beri baa nin reer miyi ahi waxa uu tegay magaalo. Waxa uu magaaladii ku arkay waxyaabo badan oo uu la yaabay oo ay ka mid ahaayeen gawaadhi faro badan oo aanu waligii arag. Isaga oo maalin suuqa maraya ayaa waxa uu arkay gaadhi Taksi ah oo uu

daba cararayo gaadhi weyn oo Sabaax ahi. Inta uu yaabay ninkii reer miyiga ahaa, ayuu u qaatay inay is dhaleen, waxaanu yidhi, ``*Wuu roori, uu kadaba roori, beeroow balaayo qabe´´*.

13. Iskaa Tusa

Nin reer miyi ah ayaa magaalada u soo iib geeyay dhowr halaad oo geela. Ninkii markii uu sayladii xoolaha ka soo dhamaystay muraadkiisii, faraqana ku soo guntaday kharashkiisii ayaa waxa uu yimi suuqa weyn ee magaalada.

Waxa uu galay macdaar weyn waxaanu ku arkay muraayado faro baddan oo lagu iibinayo. Inta uu aad ula dhacay muraayadahan layska dhex arkayo ayuu ninkii dukaanka lahaa ku yidhi, `` *Hadee adeer iskaa tusadaasi waa imisa*?´´ Ninkii dukaanka lahaa oo arkay in odaygu badow yahay ayaa ku yidhi, `` *Adeer mid aad goynayso maaha*.´´ Odaygii reer miyiga ah oo aad uga helay muraayadii ayaa waxa uu ugu jawaabay, `` *Hadee adeeroow waxaan soo iibiyay dhowr halaad oo geela'e miyaanay ii goynayn iskaa-tusadan?´´*

Ninkii dukaanka haystay oo u arkay inay fursad tahay ayaa ugu war celiyay, `` Adiga *waxbaanu kaa dayne, waxaad hayso uun keen*.´´ halkii baana odaygii wixii uu lacag hayay lagaga furtay.

14. Waar afku dabloow lacagtaydii isii

Nin reer miyi ah ayaa waxa uu u safray magaalo. Magaalada cidna kama uusan aqoon, gabalkiina waa ugu dhacay. Waxaanu guntan yahay lacagtii uu ku soo iibiyay xoolihii uu waday.

Waxa uu maqli jiray uun inay magaaladu tuug badan tahay oo marka xoolaha la iibiyo aan lacagta la sidan oo dukaamada la

dhigto. Nasiibdarrose wax dukaana ka muusan garanayn magaalada. Markii uu in muddo ah lacagtii watay ayuu markii danbe go'aansaday inuu cid uun u dhiibto.

Waxa uu ku soo baxay nin Sigaar cabaya oo meherad hor taagan. Dhimbiishan dabka ah wax afka ku haysta hore umuusan arki jirine waxa uu iska dhaadhiciyay inay tahay calaamad uu hadhow ninkan ku garan karo. Inta uu salaamay ayuu ku yidhi, `` W*aar afku-dable lacagtanaan sitaa oo meel aan dhigo la' ahaye ii hay berri ayaan kaa qaadan doonaaye´´.*

Farxadi waa naxdine ninkii sigaarka cabayay halkii buu lacagtii ku qaatay isagoo u arkay odayga reer miyiga ahi inuu khadar loo soo diray yahay.
Odaygii reer miyiga ahaa ayaa maalintii danbe goor fiida meeshii yimid si uu ninkii lacagtii uga soo qaato. Ileen ninku nin wadada iska marayuu ahaaye odaygii meeshii wuu ka waayay.

Cabbaar markii uu raadiyay ayaa waxa ka soo hor baxay nin sigaar cabaya, waxaanu u qaatay inuu yahay ninkii uu lacagta u dhiibtay, halkii baanu ku qabsaday, ninkiina isagoo yaaban oo odaygu inuu waalan yahay u malaynaya ayuu isaga tagay. Odaygii reer miyiga ahaa talo ayaa ku cadaatay ninkii kasta ee wadada soo marana waa uu qabsanayay isagoo ku leh, `` *Waar afku dabloow lacagtaydii isii .´´*

15. Geeridii Nabiga ayaan xusuustay (CSW)

Nin Odawaa la odhan jiray ayaa beri waxa uu ka soo qayb galay casuumad qado, markii cuntadii la soo dhigay ayaa raggii saxankii hareeraha ka galeen, raashinka oo kululaa awgiina nin kastaaba marka uu sacab qaato waa uu iska afuufayay inta aanu afka galin.

Warsame oo ragga cuntada la boobayay ayaa inta uu sacabka buuxsaday afka dalaq siiyay. Isla markiiba raashinku wuu kululaaye

waxa uu kaga dhagay laabta. Naftu waa wax baase, ilmo waa weynbaa markaliya shax ka soo tidhi. Raggii baa inta ay yaabeen waydiiyay waxa ku dhacay. Illeen waa nin nafi haysee, inta uu hoos u foorarsaday ayuu ugu jawaabay, `` Geeridii *Nabiga ayaan xusuustay (CSW) ´´.*

16. Waar miyaaydaan ogayn inuu farxalku TB -da ka dawo yahay?

Beri ayaa niman badan oo macaariifa waxay wada cunayeen qado. Cuntada oo kululayd awgeed ayaa mid ka mid ah nimankii ku istaagtay. Naftu way macaantee intuu markiiba la booday maddiibaddii uu farxalku ku jiray ayuu isku qabtay. Nimankii kale oo yaaban ayaa ku yidhi, `` *Waar waa ku sidee?´´* Inta uu si reer magaalnimo ah u qoslay ayuu ku yidhi, `` *Waar miyaaydaan ogayn inuu farxalku TB -da ka dawo yahay?´´*

17. Hadday ku qaban lahaayeen aabbahaa bay kugu waxayn lahaayeen

Waa baa oday reer Soomaaliya ahi waxa uu booqday inantiisii oo lagu qabay waddanka Jabuuti. Waxa uu odaygii ku soo beegmay xilli ay adkayd in laga gudbo soohdinta labada waddan u dhexeysa.

Odaygii waxa uu rafaadaba waxa uu gaadhay magaalada Jabuuti. Goor fiida ayuu gurigii inantiisa soo galay. Inantii oo aan in badan aabbeheed aragina si fiican ayay u soo dhawaysay.

Markii ay cawayskii tahay ayaa ninkii inanta qabay oo shaqo ka soo rawaxay gurigii yimid, halkii baana isaga iyo soddogii si fiican isku qaabileen, layskuna waayo waraystay. Waxa kale oo uu odaygii waydiiyay sida uu soohdinta uga soo gudbay maaddaama oo xadku

hadda adag yahay. `` Illaahay uun baa ii sakhiray aabbe, wax dhib ah lamaan kulmin´´ baa uu odaygii ku jawaabay. Cali oo wali hadalkii sii wata ayaa ugu jawaab celiyay odaygii, `` Illaahay baa kuu sakhiraye, hadday ku qaban lahaayeen aabbahaa bay kugu waxayn lahaayeen´´.

18. Miyuu xitaa Siyaad Barre yimaaddo

Madaxweynihii hore ee Soomaaliya, Siyaad Barre ayaa beri waxa uu booqasho ku yimid gobollada waqooyiga gaar ahaan magaalada Hargeysa. Waxa uu watay gaadhi yar. Markii uu kaantaroolka dhanka bari ee magaalada ka soo galayay ayaa waxa istaajiyay askarigii habeenkaas gaadhka ku qornaa waayo habeenkaasi waxa jirtay bandoo lagu soo rogay magaalada maaddaama uu madaxweynuhu imanayay. Haddaba waxaa dhex martay sheekadan .

Askarigii. ``Istaag! hadda lama ogala inaad magaalada gashee, dhankaa u istaag.

Dirawalkii Madaxweynaha. `` Walaal waanu dagdagaynaaye naga fur istabta´´ .

Askarigii. ``Waar caawa lagaa furi maayo, miyuu xitaa Siyaad Barre yimaaddo´´.

Gaadhigii ay saarnaayeen madaxweynaha iyo dirawalkiisu, xagii bay cabbaar iska taagnaayeen ilaa intii loo ogolaanayay.

Markii uu madaxweyne Siyaad Barre magaalada galayna waxa uu ku amray saraakiishii booliska inay u yeedhaan ninkii istaajiyay. halkii baana ninkii askariga ahaa lagu dallacay, abaal gudna uu madaxweynuhu ku siiyay, isagoo ku amaanay sida fiican ee uu shaqadiisii u gutay.

19. Wax Walba Haye

Wax Walba Haye waxa uu ahaa dukaan weyn oo magaaladda uu ku yaalo aad looga yaqaano. Haddaba Caasha Xasan oo ahayd gabadh dukaanka deris la ahayd ayaa waxa ay la yaabtay sida uu dukaankani magaca weyn u qaatay, waxaanay jeclaysatay inay u sheegto mulkiilaha dukaanka in aanuu magacaa weyn qaadi karin. Maalintii danbe ayaa waxa ay gashay dukaankii waxaana iyada iyo wiilkii dukaanka hayay dhex martay sheekadan:

Caasha: *Walaal ma wax walba hayaa lagu yidhaa?*

Adeegihii: *Haa walaale maxaan kaa caawinnaa?*

Caasha . *Furar wayso iyo bustayaal waaraada ma haysaa*?

Adeegihii . *Maya walaal ma hayno.*

Caasha . *Oo haddaa maxaad meesha ugu qoratay Wax-Walba Haye?*

20. Lexojeclo laba nin kama wada qosliso

Nin reer miyi ah ayaa waxa uu soo booqday nin ay ilmaadeer ahaayeen oo magaalada Hargeysa degganaa. Maalin ayaa iyaga oo qolkii fadhiga wada fadhiya ayaa ninkii reer miyiga ahaa inta uu gurigii sidaa isha u mariyay waxa uu caashaqay daahii daaqadda ku xidhnaa, lamana uusan gabane waxa uu ninkii reer magaalka ahaa ku yidhi, `` Gahayroow carruurtii bay dhaxani laysayoo, durraaxaddanay ku rayn lahaayeen haddii aan u qaadi lahaa.´´ `` Guhaadoow aniga daahani igama go'o waxaanu ii yahay qaalin geela oo laba jira.´´ Gahayr oo inaadeerkii u jawaabaya, tusayana lexojeclo ayaa ugu hal celiyay Guhaad.

Guhaad ayaa inta uu qoslay waxa uu yidhi, `` Iga walee waa runtaaye hadda wixii ka danbeeya waa inaynu xoolaha is waydaarsanaa´´.

21. Waabad i xusuusiseen

Nin maskaxda ka jiran ayaa waxa uu soo dulmaray koox dumar ah oo meel wax ku karsanaya. Markii ay dumarkii arkeen ninkii xanuunsanayey ayay yidhaahdeen, ``*Naa dabka inaga qariya waakan ninkii waalnaaye, yuuna ina gubine.´´*

Markii uu ninkii xanuunsanayey hadalkoodii maqlay ayuu inta uu ku soo baydhay oo uu qori dab ah la booday ku yidhi, `` *Waabad i xusuusiseen´´, xaggii* buuna reerkii ku gubay.

22. Waar dad aananu is aqoon afka haysku kaayo galin

*I*slaan baa waa wiilkeedii curad shaxaaday oo uu waydiistay inay jaad u qaado. Islaantu way lexojeclo badnayde inankii way u diiday inay jaadka u qaado , isna kamuu samrine isagoo baryaya ayuu ku yidhi, `` *Ee hadaba hooyo Mustafe ku Sali(CSW)´´*, islaantii oo aan fahmin Mustafaha uu wiilkeedu sheegayo ayaa inta ay kor u qaylisay ugu jawaabtay,`` *Waar dad aananu is aqoon afka haysku kaayo galin´´* .

23. Ilkahaagu waxay shaqeeyeen 300 sanno

Nin Soomaali ah oo Jaad qabax ah ayaa markii uu in muddo ah cunayay jaadkii uu waxyeelo soo gaadhsiiyay ilkihiisii, waxayna ilkihiisii noqdeen badh daatay iyo badh suus wada galay, iyadoo uu intaasna u sii dheeraa xanuun ba'an oo ay ilkuhu ku hayeen.

Haddaba markii uu u adkaysan waayay xumaddii iyo kaarkii badnaa ee ay ilkuhu ku hayeen ayuu tagay dhakhtar ilkaha ku takhasusay oo ku yaala waddanka Jarmalka.

Dhakhtarkii Jarmalka ahaa ayaa markii uu qalabkiisii ku eegay ninkii ka yaabay sida ninka ilkihiisu u baaba'een, isagoo yaabana waxa uu waydiiyay su'aashan, `` *Ilkahaagu waxay shaqeeyeen 300 sanno, ee maxaad ku qabatay?´´*

Ninkii Soomaaliga ahaa oo fajacsan ayaa u sheegay inuu jaadka aad u cuni jiray.

24. Jaw! Wajigaa la gub, dooro ku lahaa

Xilli ku beegan horaantii 1960kii ayaa nin reer Waqooyi ahi waxa uu soo galay maqaayad wax laga cuno oo ku taala magaalada Muqdisho. Markii uu miiskii fadhiistay ayaa waxa u yimid Kabaryeerigii (Mudalabkii), waxaanu waydiiyay waxa ay hayaan. Kabaryeerigii ayaa ugu jawaabay, *´´ waxaanu haynaa Dooro´´*, Ninkii reer Waqooyiga ahaa ayaa inta uu kor u booday oo uu budh uu sitay kor u lulay waxa uu yidhi: *´´Jaw! Wajigaa la gub, dooro ku lahaa, waar ma wax kaluu waayay"? Halkii buuna ninkii isaga baxay.*

25. Ma anigaa Soodaanta keenay?

Xilli ku beegan 60kii ayaa hoballo reer Suudaan ahi waxay yimaaddeen magaalada Hargeysa si ay bandhig faneed uga sameeyaan. Haddaba habeen ayaa waxa ay masrixiyad aad u xiiso badan oo dad badani galeen waxay ku dhigeen tiyaatarka magaalada Hargeysa. Mar cawaysku meel fiican marayo ayaa waxaa masrixii soo istaagay fanaan aad u qaaliya oo Soomaalidu codkiisa aad u

jeclaayeen. Mar qudha ayay hablihii reer Hargeysa oo xamaasadaysan wixii ay gacanta ku hayeen oo uu dahabkoodii ku jiro waxay dusha ka saareen fannaankii. Dhaqanka Suudaanta marka uu fanaanku heesayo wixii la saaro dib looma noqdo oo fanaankaa iska leh, laakiinse Soomaalidu dib ayay ula noqdaan waxooga marka uu fanaanku hawshiisa dhameeyo. Haddaba hablihii oo sugaya inuu fanaanku alaabta soo celiyo ayay riwaayaddii dhamaatay, dadkii oo dhanna dibaday u dareereen, haddaba hablihii oo aan wali ka samrin ayaa waxay ka hor dhaqaaqi waayeen tiyaatarkii iyagoo aan wali ka quusan xoolahoodii. Mar danbe ayay askartii meesha ilaalinaysay ka hor calaacaleen, iyagoo inuun sugayay in askartu caawin doonto laakiinse askartii oo aad ula yaabtay ayaa mid ka mid ahi ugu jawaabay, `` *Ma anigaa Soodaanta keenay*?´´

26. Awowgaa la gub, ma gaadhi aan Idoor wadinbaan soo iibsan lahaa?

Nin reer Dhagaxbuur ah ayaa beri gaadhi ka iibsaday magaalada Hargeysa. Markii uu lacagtii bixiyay ayuu ka codsaday ninkii gaadhiga ka iibiyay in gaadhiga loo kaxeeyo oo Dhagaxbuur loo geeyo maadaama aanu isagu dirawal ahayn. Waxaa la raaciyay oo baabuurkii u kaxeeyay nin dirawal ah oo lacag la siiyay.

Waxay soo socdaanba goor caways ah ayay soo gaadheen magaalada Dhagaxbuur. Way daalanaayeene markiiba horey ka seexdeen. Maalintii danbe ayaa dirawalkii mulkiilihii gaadhiga u sheegay inuu rabo inuu Hargeysa ku guryo noqdo. Xaajigii gaadhiga soo iibsaday ayaa inta uu qoslay ku yidhi dirawalkii, `` *Adeer meel aad tagaysaa ma jirto ee fadhi, gaadhigana aduunbaa wadi doona´´* .

Ninkii dirawalka ahaa oo yaaban ayaa ugu jawaabay, ``*Adeer waxa aan heshiis ku galnay in aan baabuurka Dhagaxbuur kuu keeno*

waanan kuu keenay, markaa maxaad kale ee aad iga rabtaa inaan kuu qabto?´´ Xaajigii ayaa inta uu kor u dhawaaqay ugu jawaabay, *`` Aga oo hadee gaadhiga iyo adigaba waan isku kiin soo iibsadaye maxaad mooday? Awowgaa la gub, ma gaadhi aan Idoor wadinbaan soo iibsan lahaa?´´*

27. Hooyo marka uu gabalku sidaa u dhaco uun baa laygu soo xaadirayaa

Berigii guumaystaha Ingiriisku waddanka ka talinayey ayaa islaan reer miyi ah oo xanuunsanaysaa waxa ay timi cusbitaal ku yaala magaalada oo uu joogo dhakhtar Ingiriis ahi.

Islaantii oo uu wahelinayo Turjumaan Soomaali ah ayaa waxa ay xafiiskiisii ugu galeen dhakhtarkii Ingiriiska ahaa waxaana dhex martay sheekadan.

Turjumaankii: *hooyo sidee laguu hayaa?*

Cibaado: *Hooyo marka uu gabalku sidaa u dhaco uunbaa laygu soo xaadirayaa. Warmo aad arkayso ayaa halkaa dhabarka laygaga turqayaa, habeenkii oo dhanna laba indhood iskuma keeno.*

Turjumaankii ayaa sidii ay islaantu hadalka u tidhi ugu gudbiyay dhakhtarkii Ingiriiska ahaa, waxaanu dhakhtarkii la yaabay waxa habeenkii islaanta ku soo xaadira ee warmaha la dhacaya. Wuxuu arki jiray uun dad bukaana oo uu daawo u qoro e, tani waxay ku noqotay wax ku cusub waxaanu u qaatay inay dad badani habeenkii soo weeraraan oo ay warmo la dhacaan. Dhakhtarkii ayaa inta uu cabbaar aamusay waxa uu islaantii ku yidhi; *``Maanta laga bilaabo waxa aan kuu qorayaa laba nin oo habeenkii gaadh kaa haya kaana celiya qoladan kusoo weeraraysa´´.*

28. **Ma is tidhi qudhaadaaba hadal badan**

Tuug baa beri waxa uu u soo dhacay guri, islaantii reerka lahayd oo qolkeedii ku jirta ayuu tooray ku qabtay waxaanu ku yidhi; ``*Waan ku dilayaa kurkaan kaa jarayaa haddii aad juuq tidhaahdo, waan ku dilayaa, mididaan ku galin, qudhaan kaa jarayaa……´´* Islaantii oo ka yaabtay hadal badnaanta tuugga iyo sida uu iyadii u aamusiinayo ayaa ku tidhi: `` *Ma is tidhi qudhaadaaba hadal badan´´.*

Dabo yar iyo dabo weynba Allaa is baday

Gabadh reer Waqooyi ah ayaa waxa ay dagenayd magaalada Muqdisho, gaar ahaan degmada Hodan. Waxay guriga wada gali jireen laba gabdhood oo reer Banaadir ah oo xaasley ah. Haddaba gabadha reer Waqooyiga ah ninkeedu wax camal ah muusan hayn, waxaanu inta badan u keeni jiray wixii uu suuqa ka soo helo. Gabadha reer Waqooyiga ahi waxay ahayd gabadh caato ah oo karti badan reerkeedana kama aysan muuqan wax duruuf ahi. Iyadoo kolba wixii Illaahay siiyo iimaansanaysa ayaa waxa ay odaygeeda u karin jirtay bariis yar oo dalac-bilaasha oo aad yaabto macaankiisa.

Haddaba dumarkii ay guriga ku wada jireen ayaa waxa ay u quudhi waayeen gabadhii sida yar ee fiican ee ay reerkeeda uga adagtay iyo cuntadan yar ee macaan ee ay kariso. Waxa ay ku bilaabeen xaasidnimo iyo in ay raashinka ka xumeeyaan iyagoo milix badan kaga daraya, mar marka qaarkoodna ciid kaga shubaya.

Gabadhii reer Waqooyiga ahayd waxay muddo u dul qaadataba dumarkii maalintii danbe ayay iyadoo cadho is kala garan la inta ay tib yar soo qaadatay oo dibadda u soo booday ku tidhi dumarkii, ``

In badan uun baan idiin dulqaadanayay laakiinse maanta dabo yar iyo dabo weynba Allaa is badaye soo baxa oo wax iska celiya´´.

29. Waar na sii ganbadayadii oo meesha atoorihiiba la dilay maxaa hadhay?

Niman dhallinyaro ah oo reer Burco ah ayaa waxa ay aad u xiiseyn jireen daawashada aflaanta hindida. Filimka oo lagu gali jiray hal shillin ayaa ahaa mid iyaga qaali ku ah maadaama oo ay ahaayeen ciyaalo iskuul. Maalintii danbe ayay go'aan ku gaadheen inay gambo gambo isku darsadaan si uu mid ka mid ahi filimka u galo oo uu hadhow kuwa kale uga sheekeeyo. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa mid galay filimkii markii uu ka soo baxay ee la yidhi haye, bal warran ayaa xaggii laga filayay inuu filimka dabo ilaa dacal ka sheekeeyo waxa uu yidhi, " *Atoorihii baa la dilay´´.*

Dhallinyarradii ayaa inta ay xanaaqeen oo ay kaladhka wiilkii iska laalaadiyeen waxay yidhaahdeen, ``*waar nasii ganbadayadii oo meesha atoorihiiba la dilay maxaa hadhay?´´*

30. Aboowe Alaseey Meedso waan soo dhaafnay nooh

Markii gobolada Waqooyi iyo kuwa Koonfureed isku darsameen 1960kii waxaa lala kulmay isfaham darro xagga lahjadaha ah.
Haddaba laba wiil oo reer Waqooyiya ayaa waxa ay tageen Muqdisho. Markii ay in muddo ah joogeen ayay maalin shaqo waydiisteen Wasaaraddii Tacliinta, waana laga ogolaaday waxaana lagu yidhi waa inaad berri timaadaan Alaseey meedso, oo ka dhigan 6.30 subaxnimo. Wiilashii waxay u qaateen in ay tahay meel magaceed.

Aroortii danbe ayay soo tooseen 7.00 subaxnimo, waxay soo qaateen Bas si ay meeshii u yimaaddaan. Wuxuu Baskii soo socdaba waxa la soo gaadhay meeshii uu ku dhammaanayay. Markii ay dadkii ka wada dageen oo ay labadii nin uun ku soo hadheen ayaa iyaga oo yaaban waxay dirawalkii ku yidhaahdeen, `` *Walaal waxaad na gaysaa Alaseey Meedso´´*.

Dirawalkiibaa inta uu qoslay ugu jawaabay, ``*Aboowe Alaseey Meedso waan soo dhaafnay nooh´´*.

32. Naa naga aamus, Jiis micnahiisu waa curyaane

Wakhti ku beegan Lixdameedyaddii ayaa gabadh reer Waqooyi ahi waxay gaadhay magaalada Muqdisho. Maalin ayaa iyada oo suuqa maraysa waxa ay la kulantay nin curyaan ah oo gaadhi jiidhay oo waddada agteeda yaala dad badanina ay ku xoonsan yihiin.

Waa ay ku baydhay. Qof kasta oo soo dul istaagaaba inta uu ka naxo ayuu yidhaa, `` Alla waa jiis.´´ Gabadhii markii ay cabbaar dul taagnayd ayaa waxa ay ka yaabtay sida qof kasta oo ku soo baydhaaba u garanayo ninkan ileen waa kuwan magaciisii garanaya ee jiista haya ‘e.

Muddo kadib waxay timi xaafaddii. Markii ay gurigii soo gashay ayay tidhi, `` Maanta waxa aan arkay nin caana oo gaadhi jiidhay, oo magaaladii oo dhami iskugu timi´´ Oo magaciisa maxaa la lahaa, ayaa la waydiiyay. `` *Jiisbaa la odhanayay, dadkoo dhamina way garanayeen.´´ Inta lagu qoslay ayaa lagu yidhi, `` Naa naga aamus, Jiis micnahiisu waa curyaane´´*.

33. Ijaabo

Xilli ku beegan horaantii sagaashameedkii ayaa oday reer miyi ahi waxa uu u soo safray magaalada. Markii uu muraadkiisii magaalada ka dhamaystay ayuu waayay wax gaadhi ah oo tuuladiisii geeya.

Maalintii danbe ayuu goor fiida isaga caraabay magaaladii una lugeeyay tuuladiisii. Markii uu in nabar ah socday ayaa waxa uu la kulmay gaadhi ay wataan niman jabhad ahi (Dayday). Wuu u gacan haadiyey wayna u istaageen. Waxa uu ka codsaday inay qaadaan oo ay geeyaan tuuladiisii maadaama oo ay marinkooda tahay. Niman qalqaaliyay ahaayeene mid ka mid ah raggii ayaa ku yidhi odaygii, `` *Aanu ku qaadnee horta Ijaabo ku Sali´´* isagoo ka waday dirawalka gaadhiga oo Ijaabo la odhan jiray. Odaygii oo baahidiisa eegaya ayaa yidhi, `` *Calayhi Ijaabatu wasalam´´*, gaadhigiina halkii buu ku raacay. Muddo markii ay socdeen ee tuuladii loo soo dhaw yahay ayaa odaygii inta uu nimankii kor u fiiriyay ku yidhi, `` *Horta waxaan idin waydiiyay Ijaabo ma ina Rasuulbay ahayd?´´*

34. Islaan baa i gashay

Berigii guumaystaha Ingiriisku joogay dalkeenna ayaa islaan reer miyi ahi waxay u tagtay Dhakhtar Ingiriis ah oo cusbitaalka magaalada joogay. Markii uu qaabilay ayay islaantii u muraad sheegatay dhakhtarkii waxaanay ku tidhi, ``*Anigu hooyo baryahanba waan xanuunsanayaa, habeenkiina hurdo laba indhood iskuma keeno, waxaana i gashay islaan aanu daris nahay oo habeen kasta way iga dhex hadashaa´´* .

Ninkii turjumaanka ahaa oo hadalkii islaanta turjumaya ayaa waxa uu yidhi `` *She said, another woman entered me and every night she is talking inside me´´*.

Dhakhtarkii wuu yaabay, wuxuuna u qaadan waayay sida qof bina-aadam ahi qof kale u dhex gali karo, waxaanu u yeedhay turjumaan kale oo si fiican ugu turjumay una sharaxay muraadkii islaanta. Waxaanu halkii ku eryay turjumaankii hore.

35. Aw-guuriyo ma aroosadda magaceedaa?

Nin reer Waqooyi ah ayaa beri waxa uu tagay magaalada Xamar. Markii uu in muddo ah joogay ayuu habeen tagay aroos magaalada ka jiray.

Waxay ahayd markii ugu horraysay ee uu aroos Xamar ka dhacay tago'e, waxa uu la yaabay sida ay wax u socdeen. Qof kasta oo soo galaaba waxa uu u hambalyaynayay lammaanaha is guursaday isagoo qof kastaaba lahaa, `` *Aw-guuriyo .... Aw-guuriyo´´.*

Ninkii reer Waqooyiga ahaa waxa uu garan waayay waxa ay kalmadan aw-guuriyo tahay, waxaanu u qaatay inay aroosadda magaceeda tahay. Nin ay wada socdeen buu inta uu dhagta u saaray ku yidhi, `` *Waar haddaba Aw-guuriyo ma aroosadda magaceedaa?´´* **36 . Oo kii qaad ahaana goormuu gacmo yeeshay?**

Beri baa oday waxay isku dhaceen islaantii uu qabay. Islaantu waxa ay ahayd mid yara kulule inta ay tib soo qaadatay ayaa ay afka kaga dhufatay odaygii, halkii buuna odaygii ku ilko beelay dibintuna ay faruurantay.

Maalin danbe ayuu Halac yimid makhaayad uu inta badan ka shaahayn jiray. Markii uu sidaa u soo fadhiistayba oday ay saaxiib ahaayeen baa inta uu salaamay waxa uu ku yidhi, Odaygii: *Waar halac maxaa ilkihii kaaga dhacay?*

Halac: *Waar ninyow qaadbaa iga daadiyay.*

Odaygii ayaa inta uu qoslay waxa uu Halac ku yidhi, `` *Oo kii qaad ahaana goormuu gacmo yeeshay?´´.*

37. Haddii Laxoox lagu yidhaahdo , xuux ha moodin Canjeero lee waaye

Markii kacaanku waddanka Soomaaliya qabsaday 1969kii waxa uu bilaabay inuu sameeyo is dhexgal bulsho, waxaana inta badan askarta iyo macallimiinta shaqadooda loo beddali jirey deegaanno kale iyada oo laga kaxaynayo deegaanka ay ka soo jeedaan. Haddaba beri baa askari reer Xamar ah oo in muddo ah ka shaqaynayay goboladda waqooyi (Somaliland) waxaa u yimi walaalkii oo macallin ahaa oo isna la soo beddalay.

Askarigii oo walaalkii soo dhawaynaya warbixinna ka siinaya habdhaqanka dadka reer waqooyiga ah ayaa hadalkiisii ku bilaabay: `` *Haddii Laxoox lagu yidhaahdo, xuux ha moodin Canjeero lee waaye. Haddii soo dhacyeey aad maqasho, wax cirka ka soo dhacay maahan Jaad lee waaye. Gambo haddii lagu dhahoo, ha gabannin, kumi lee waaye´´*

38. Aroor kastaba intaad igu soo kallahdo ayuun baad af-qadhmuunoow i lahayd

Jaamac waxa uu ka mid ahaa saraakiishii sarsare ee daraawiishta waliba waxa uu ahaa nin ay aad iskugu dhawaayeen Sayidka.
Beri baa waxay is raaceen Faarax oo ay ilmaadeer ahaayeen isna ahaa turjumaan la shaqayn jiray Ingiriiska, waxaana ay tageen magaalada Herar si ay u dhex dhaxaadiyaan laba ardaa oo reerkooda ahaa oo dagaal dhexmaray.

Markii ay Herar yimaaddeen ayaa Faarax oo ahaa nin fanaana aadna u qab weynaa uu isagu labadii qolo dhex galay, oo uu heshiisiiyay, odaygii Jaamac oo uu reer miyinnimo ku yasayayna waxba hawsha kama uusan waydiin. Aroortii inta uu qolkiisa ugu soo galo ayuun buu ku odhan jiray `` *Good morning´´*, kadibna wuu ka tagi jiray.

Maalintii u danbaysay ayaa uu Faarax soo kaxeeyay Jaamac una keenay raggii oo geed ku hoos qayilaya. Cabbaar markii la fadhiyay mirqaankiina isku dubo dhacay, ayaa Jaamac ileen nin aftahanuu ahaaye galkii seefta kala baxay, isaga iyo raggiina ay sheeko iskugu dubo dhacday. Wax dhegaysta mooyee wax dhag dhaqaajiya waa la waayay.

Markii uu fadhigii dhamaaday ayaa ninkii Faarax oo goorahaaba la yaabbanaa aftahannimada Jaamac uu ku yidhi Jaamac,

`` *Oo adeer dee inaad sidan u aftahan tahay maba aanan moodayne, ileen halis baad tahay?´´*

Jaamac baa inta uu qoslay ugu hal celiyay, `` *Maxaad aftahannimadayada ku ogaan, maadaa waxbaba i waydiiyay, aroor kastaba intaad igu soo kallahdo ayuun baad af- qadhmuunoow i lahayde´´* . Waxa uu Jaamac af-qadhmuunoow ka wadaa ereyga, (Good *Morning*) oo uu fahmi wayay micnaheeda.

39. Waxba maanan sheegin

Aniisa yar oo ka mid ah carruurta Soomaaliyeed ee ku dhalatay qurbaha, gaar ahaan dalka Iswiidhan, ayaa maalin waxaa gurigooda soo booqday oday u adeer ah. Markii uu guriga soo galay ayaa waxa uu albaabka kula kulmay Aniisa, isagoo salaamayana waxa uu ku yidhi, `` *Adeer maxaad sheegtay?´´* Aniisa yar inta ay naxday oo ay hoos u foorarsatay ayey ugu jawaabtay, `` *Waxba maanan sheegin´´,* waxay salaantii u qaadatay in uu adeerkeed waydiinayo inay war cid kale u sheegtay iyo in kale.

40. Alla qaadka suuli suuli ayaa ka uraya

Nin qurbaha in badan ku noolaa ayaa soo booqday reerkooda oo deganaa waddankii. Waxa uu ahaa nin dalkii ka baadaye, waxa uu

ahaa nin inta badan ku mashquulsan la kulanka asxaabta iyo ehelkiisaba.

Maalin ayaa waxa uu jaad u qaaday niman ay saaxiib ahaayeen oo ayna in muddo ah is arag, halkii baa lays waraystay, Caydiidna waxa uu uga sheekeeyay nolosha qurbaha. Isagoo is faaninayana waxa uu u sheegay inuu shaqo fiican ka hayo Yurub oo uu shirkad weyn madax u yahay. Cumar oo ka mid ah ragga ay wada qayilayeen oo isagu Caydiid warkiisa hayey oo ogaa inuu shaqo hoose oo dhul nadiifin ah uu ka shaqeeyo ayaa iska aamusay oo aan Caydiid khashifin. Cabbaar markii la fadhiyay ee uu mirqaankiina meel fiican u marayo ayaa Cumar inta uu minjin jaada bacdii ka soo saaray oo uu kor u qaaday oo uu sanka saaray uursaday, inta uu kor u dhawaaqayna yidhi, `` *Alla qaadka suuli suuli ayaa ka uraya´´, isagoo ula jeeday in Caydiid shaqo nadaafada ka shaqeeyo Yurub.*

41. Karaaciin

Faarax waxa uu ahaa nin dhallinyar ah oo reer miyi ah, weynina magaalada ku soo galay. Waxa uu ahaa nin badownimada cuqdad badan ka qabay. Maalin ayaa waxa ay is raaceen nin ay saaxiib ahaayeen oo reer magaal ah, waxaanay soo wada galeen makhaayad cunto. Markii uu kabaryeerigii u yimi ayuu ninkii reer magaalka ahaa dalbaday Karaaciin. Faarax oo goorahanba garan la'aa wax uu dalbado ayaa isna wiilkii mudalabka ahaa ka dalbaday Karaaciin. Kabaryeerigii ayaa isla markiiba isagoo la ordaya u keenay dalabkii, mise waa lugo adhi oo maraq laga sameeyay. Faarax waxa uu islahaa saaxiibkiisa reer magaalkii wax fiican buu dalbane, waxa uu la yaabay waxa loo keenay, inta uu xishooday oo uu wax uu ku hadlo waayay ayuu halkii kaga kacay raashinkii sidii baanu ku cunto beelay.

42. Waxaan ahay ciyaalo Madiina

Maaddaama oo ay Muqdisho ahayd caasimaddii dalka ku dhaqanka qabyaaladdu waa uu ku yaraa marka loo eego sida uu ugu xooga badnaa dhulalka miyiga. Haddaba horraantii sagaashamaadkii oo ay dagaaalo ba'ani ka socdeen Muqdisho ayaa koox dablay ahi qabteen nin dhallinyarro ah oo reer Muqdisho ah. Kooxdii dablayda ahayd oo wiilkii haybtiisa warsanaysa ayaa waydiisay qabiilkiisa, nasiibdarro ma uusan garanayn qabiilkiisa oo waxa uu ahaa uun wiil Soomaaliyeede waxa uu ugu jawaabay, `` *Waxaan ahay ciyaalo Madiina´´*, Madiina waa xaafad ka mid ah magaalada Muqdisho.

43. Maanta oo dhan baan iska kari la'aa oo uu i lahaa feedh igu jiid

Xilli ku beegan horaantii Lixdameedyadii ayaa nin reer Waqooyi ah oo ku cusbaa magaalada Muqdisho soo galay timo-jare, si uu uga xiirto. Markii uu kursigii ku fadhiistay ee tima-jarihiina damcay inuu shaqadiisa bilowdo ayaa waxa dhex martay sheekadan.

Ninkii reer Waqooyiga ahaa: *Waar horta noo feedh*?! Ninkii reer Xamarka ahaa yaa fahmi waayay, haddana mar labaad ayaa ninkii timaha loo jarayay ku celiyay hadalkii.

Ninkii reer Xamarka ahaa oo yaaban, una qaatay in ninku leeyahay I feedh, ayaa ugu jawaabay, `` Aboowe *side lee waaye, naga dhaaf nooh´´*

Ninkii reer Waqooyiga ahaa ayaa hadana ku celiyay, `` *Waar dee adigaan kula hadlaynaaye noo feedh?´´*

Ninkii reer Xamarka ahaa ayaa inta uu xoog iyo xiniintii is kala jiiday bahal feedha oo aad yaabto ku dhuftay ninkii reer Waqooyiga ahaa, halkii baanay ku dagaalameen.

Dadkii baa ku soo yaacay, waydiiyeyna waxa ay isku dagaaleen.

Ninkii reer Xamarka ahaa oo wali isla saxsan ayaa ku jawaabay, `` *Maanta oo dhan baan iska kari la'aa oo uu i lahaa feedh igu jiid´´.*

Ninkii reer Waqooyiga ahaa oo daanku kuusan yahay oo ciil bastiiya ayaa dadkii ku yidhi, `` *Waar ii feedh timaha uun baan idhoo bahal feedha uun buu igu daandaamiyay´´.*

44. Adeer roodhi iga iibi

Wakhti ku beegan markii ay midoobeen gobolada Waqooyiga iyo Koonfurtu ayaa nin reer Waqooyi ahi waxa uu tagay magaalada Kismaayo. Maalin ayaa waxa uu soo galay dukaan si uu uga iibsado rooti uu cuno. Waxaana isaga iyo wiilkii dukaanka ka shaqaynayay dhex martay sheekadan.

Ninkii reer waqooyiga ahaa: *Adeer roodhi iga iibi.*

Wiilkii dukaanka ka shaqaynayay ayaa u soo fidiyay roodhimo (Baaguudi). Ninkii reer Waqooyiga ahaa oo xanaaqsan, una qaatay in uu wiilku ku ciyaarayo ayaa dukaankii iskaga baxay.

45. Anigaa wadhay

Geele waxa uu ahaa nin aad u muqayil ah. Waxa uu qayili jiray maalin kasta isagoo mararka qaarna ku gaadhi jiray saqda dhexe.

Haddaba habeen ayaa isaga oo aad u mirqaasan oo dhowr mijood ku tageen waxa uu xilli danbe u soo hoyday gurigiisii. Waxay ahayd goor danbe oo carruurtii iyo hooyadoodba seexdeene, inta uu kildhi biyo ku qaatay ayuu guriga hortiisii iska fadhiistay si uu laydha u qaato. Cabbaar markii uu fadhiyay ayaa uu go'aansaday inuu

dharkii reerka oo dhan maydho. Wax Alla wixii dhar uskag ah guriga yaalay buu ururiyay ilaa daahyadii aqalka sudhnaa buu soo furay si uu u maydho, isagoo xitaa bustayaashii carruurtu huwanayd ka soo dul qaaday. Halkii buu dharkii ku maydhay, kuna wadhay xadhko barandaha guriga ku xidhnaa oo dharka in lagu wadho loogu talo galay. Kadib na wuu iska seexday. Muddo yar ka dib waxa soo dhacay tuug, kaasi oo wada qaatay wixii dhar ahaa ee uu Geele maydhay.

Aroortii hore ayaa markii ay soo toostay Geele xaaskiisii, waxay aragtay gurigii oo qaawan oo wax jirqinii aanu oolin. Geele ayay toosisay una sheegtay inuu tuug u soo dhacay oo uu caydheeyay. Geele oo dhalalowsan ayaa ugu jawaabay, `` Anigaa *wadhay´´*.

46. Bile Rafle iyo Islaantii

Bile Rafle waxa uu maayar ka ahaa maagaalada Hargeysa xilligii Siyaad Barre ka talinayay Soomaaliya. Bile intii uu maayarka ahaa waxa uu qabtay waxyaabo badan oo lagu xasuusto, sida isaga oo kor u qaaday bilicdii magaalada Hargeysa. Waxa uu inta badan nidaamin jiray xaafaddaha magaalada, isagoo mararka qaarna wadooyin u samayn jiray. Haddaba hawlgallada noocaas ah ayaa inta badan waxaa ka caban jiray xaafadaha qaarkood. Haddaba Bile oo inta badan ka soo xaadiri jiray goobta ay shaqadu ka socoto ayaa maalin waxa uu goobtii kula kulmay islaan da' ah oo isaga ka cabanaysa, waxaanay ku tidhi, `` *Hooyo waanu daalnay oo mid baas oo Bile Rafle la yidhaa baa nalagu saliday´´*, Bile ayaa inta uu islaantii la sii sheekaystay mar danbe isku sheegay. Illayn naxdini kuma disho'e islaantii dhabannahays iyo afkala qaad bay ku noqotay.

47. Oday iyo wiilkiisii

Wiil Bantu (Jareer) ah ayaa aabbihii waydiistay inuu u doono gabadh aji ah. Aabbihii ayaa yidhi, `` *Wiilkaygiiyow ha I ceebeyn oo marada ha iga dhigin waad ogtahay in gabadh aji ah aan nala siinayn.*``

Wiilkii ayaa ku adkaystay in uu jecel yahay gabadhaas, kaddibna aabbihii wuu u doonay gabadhii, waxaanu maray jidkii ii xurmada lahaa ee gabadh loo dooni jiray.

Markii gogoshii la soo fariistay ayaa odaygii reerkii kale waydiistay gabadhii isaga oo u sheegay in uu u doonayo wiilkiisa wixii xurmo ahna uu diyaar la yahay. Markii warkii la maqlay ayaa odaygii gabadha dhalay yidhi, `` *Waar ninyahoow waad ogtahay in aynaan is guursane ma waxaad u dan leedahay in gabadh aad guur tirtid oo la yidhaahdo mar baa gabadhaas nin Jareer ah soo doonay, ninyahoow mar danbe yaan afkaaga laga maqlin hadalkaas oo kale.´´*

Odaygii oo ay maradii ka dhacday ceeb daraadeed ayaa ku noqday wiilkiisii oo ku yidhi, `` *Sow kuuma sheegin reerkii gabadhii way noo diideen ee wiilkaygiiyoow raadso gabadh reerkaaga ah.´´*

Odaygii oo ka xanaaqsan wixii lagu soo sameeyay ayaa fikiray. Waxa uu ku guursaday magaaladii uu deganaa ee Baladweyne naag shanaad isaga oo horey afar u qabay. Magaaladii ayaa mar kaliya isla sare kacday, dadkii oo dhanna waxa ay ku eedeeyeen inuu diin cusub la yimi. Dadkii magaalada ayaa waxa ay u soo direen odayaal kala hadla arrinta foosha xun ee uu sameeyay, waxaana odayaasha ku jiray odaygii berigii gabadha u diiday. Odaygii baa loo yimid oo la waydiiyay in ay jirto waxa laga sheegayo ee ah in uu qabo shan dumar ah.

Waxaanu yidhi, `` *Haa waa jirtaa waa sax´´* Waxa la waydiiyay diinta uu ku qabo.

Waxa uu yidhi, `` *Diinta Islaamka ´´*

Waxa ay yidhaahdeen, `` *Diinta waan naqaan ee xaggee kaga jirtaa kitaabka Qura'aanka, waa aayaddee aayadda u fasaxaysa in ninku shan dumar ah guursan karo?´´*

Waxa uu yidhi, `` *Waxa ay ka hoosaysaa oo ay ku xigtaa aayadda odhanaysa ninka Jareerka ah gabadh aji ah ma guursan karo.´´*

48. Alla Diintuu caayey

Khayriyada magaalada Hargeysa ayaa sida caadada ah waxaa lagu qabtaa munaasibado kala duwan, ha u badnaadeen kuwo qarane.

Haddaba maalin ay ku beegnayd 26kii Juun ayaa waxa lagu qabtay munaasibad aad u weyn oo shacabka magaalada ku dhaqani aad uga soo qayb galeen.

Maxamed yare waxa uu ka mid ahaa arday badan oo munaasibadda ka soo qayb gashay. Waxa uu dhex taagnaa dad aad u tiro badan, waxaanu dhagaysanayay khudbadii meesha ka socotay. Haddaba laba nin oo tuuga ayaa waxay aad uga heleen saacad aad u qurux badan oo uu Maxamed xidhnaa. Inta ay u soo dhawaadeen ayuu mid ba dhinac iska taagay. Labadii nin mid ka mid ah ayaa Maxamed yare saacaddii ka goostay. Maxamed Yare oo naxsan oo hadal ka soo bixi la' yahay ayaa Tuuggii kale oo bidixdiisa taagnaa inta uu dhirbaaxo weyn ku dhuftay yidhi `` *Alla diintuu caayey´´* Tuuggii kale oo saacadii jeebka ku ritay ayaa isna inta uu wiilkii yaraa

dhirbaaxay yidhi, ´´ *Waar bal waxaa edebta daran eega.*´´ Dadkii meesha joogay oo aan waxba hubsan ayaa mar kaliya wiilkii yaraa gacanta saaray. Intii laysku buuqsanaa ayay labadii tuug baxsadeen. Wiilkii yaraa oo oohini ka dhamaatay ayaa mar danbe dadkii u sheegay inaanu diinta caayin ee ay nimanku tuug ahaayeen.

49. Fiiso nool

Wiil dhallinyara oo waddankii jooga ayaa waxa uu guursaday gabadh qurbaha ka timid. Haddaba dhallinyaro ay wiilka saaxiib ahaayeen ayaa sheekadiisii maqashay, waxaanay isla garteen inay saaxiibkood u shaxaad tagaan maaddaama oo uu gabadh soo degtay guursaday. Wiilashii ayaa caruuskii u yimid waxaanay ku yidhaahdeen`` *Hambalyo caruus waanu maqalnay inaad fiiso nool guursataye, kaalay oo jaadka noo qaad´´*.

50. Baran-baro iyo Bariis

Qawdhan waxa uu magaalada kaga xamaalan jiray gaadhi-gacan, dhaqaalaha soo galaana waxa uu ku xidhnaa hadba sidii uu u helo dad uu raashin ama alaab u qaado. Haddaba maalin uu suuqu ku xumaaday, waayayna cid uu wax u qaado ayaa waxaa qabatay gaajo kulul. Wax lacaga ma uusan haysane waxa uu galay makhaayad raashinka lagu kariyo. Waxa uu dalbaday saxan bariisa iyo madiibad maraqa. Markii uu dhargay ayaa inta uu saxankii inyar oo bariisa ku soo reebay waxa uu jeebada kala soo baxay xabbad baran-baro ah waxaanuu ku dhex riday raashinkii uu soo hambeeyay, waxaanuu u yeedhay oo uu tusay kabaryeerigii, isagoo canaananayana ku yidhi, `` *Waar ma waxaa saad dadka ka iibinaysaan*?´´, Kabaryeerigii ayaa inta uu naxay ugu jawaabay, `` *Adeer duco qabe, ceebtaada Alle ha asturee na astur oo lacagna ha bixine orodoo iska bax.*´´

51. Haddaa la helay

Markii uu telefoonka gacantu dhulka soomaaliyeed soo gaadhay ayaa maalin islaan la socota wiil ay dhashay waxaa ka soo hor baxay nin si fiican u labisan oo telefoonkii gacanta ku hadlaya. Islaantii oo aan hore u arag qof telefoonka gacanta sita oo u qaadatay inuu ninku waalan yahay oo uu isla sheekaysanayo ayaa wiilkeedii ku tidhi, `` *Alla hooyo bal eeg, waa mid hadda uun la helay. Alle ha sahlo kuwii wax haystayna waa kuwaas dhaqaaqay´´.*

52. Magaalooy, waligaaba meer meer caawa adiguun baan marti kuu ahay

Beri baa nin reer miyi ahi waxa uu safar ku yimi magaalo. Wax ehel ah ama cid garasho ah kama uusan aqoon magaalada'e waxa uu maalintii oo dhan magaalada ka raadiyay cid uu garto oo uu martiyo. Waxa ay ahayd magaalo aanu cidna ka garanayne waxa uu ku asqoobay mawjadihii dadka ahaa ee maalintii oo dhan kolba dhinac u dhaafayay. Goor fiidkii ah ayaa isaga oo aad u daallan waxa uu fadhiistay geed suuqa badhtankiisa ku yaalay, isaga oo dadkii wadada marayay la hadlayana waxa uu yidhi, `` Magaalooy, *waligaaba meer meer caawa adiguun baan marti kuu ahay*.´´.

53. Waa nin sheeko macaan, laakiinse waan la waraabin karayn

Wiil dhallinyarta qurbo joogta ka mid ah oo cunista qaadku ku cusub tahay ayaa waxa uu habeen la qayilay nin jaad-qabax ah oo dhowr minjood ayna soo celin. Ninka jaad cunka ahi waxa uu ahaa mid marka uu qayilayo biyo badan caba. Haddaba maaddaama wiilka marti loo ahaa oo gurigiisa lagu qayilayay, waxa uu wiilkii ku daalay kicitaankii badnaa ee uu kolba ninka biyo ugu keenayay. Waxa uu mirqaankii iskugu dubo dhacaba halkiibaa habeenkii lagu kala seexday. Aroortii danbe ayaa wiilkii waxa uu la kulmay dhallinyaro kale oo ay asxaab ahaayeen, waxaanay waydiiyeen sida uu xalay fadhigoodu ahaa. Wiilkii ayaa ugu jawaabay, `` *Ninkaan la qayilayay waxa uu ahaa nin sheeko macaane, laakiinse waan la waraabin karayn´´*.

54. Aboowe Boosaaso lee joogtaa

Tahriibayaal Soomaali u badan ayaa waxa ay doon ka raaceen magaalada Boosaaso iyaga oo u jeeday dalka Yemen. Muddo laba habeena markii ay doontii badda kula jirtay ayaa dadkii lagu soo celiyay isla magaaladii Boosaaso ee ay laba caano maal ka hor ka shiraaqdeen. Waxa uu naakhuudihii doontu dadkii u sheegay inay soo gaadheen magaaladii ay u socdeen ee Sanca, inta uu iftiinkeedii tusay ayuu ku yidhi, `` *Waa taas magaaladiiye dhinac ka gala*.´´ Dadkii oo faraxsan, una haysta in ay soo gaadheen meeshii ay hiigsanayeen ayaa magaaladii goor fiida soo galay, ninkii hor kacayay tahriibayaasha ayaa soo galay dukaan ay gabadhi hayso waxaanuu su'aalay, `` *Walaal halkay ku taalaa safaaradda Soomaalidu ku leedahay dalkan Yemen?´´* Gabadhii oo la yaabtay ninka hadalkiisii ayaa ugu jawaabtay, `` *Aboowe Boosaaso lee joogtaa.*
´´

55. Waar kaa furi maynee meeshaad ka timid ku noqo

Nin dhallinyar ah oo ka mid ah dhallinyarta qurbaha ku kortay ayaa waxa uu booqasho ku tagay magaalada Hargeysa. Waa uu ku cusbaa magaalada' e waxa uu ka degay huteel magaalada ku yaalla. Muddo markii uu joogay ayaa habeen waxa uu xilli danbe u soo hoyday hudheelkii uu deganaa. Maaddaama oo hudheelka albaabkiisa dibaddu uu xidhnaa, wuu garaacay albaabkii. Waashmaankii hudheelka oo gartay in albaabka dibadda la garaacayo ayaa inta uu soo kacay waxa uu yidhi, `` *Waar waa kuma?´´* Wiilkii oo aad u dhaxamoonaya ayaa ugu jawaabay, `` *Waa ninkii hudheelka deganaaye iga fur.´´* Waashmaankii hudheelka oo xanaaqsan ayaa si cadho leh ugu jawaabay, `` *Waar kaa furi maynee meeshaad ka timid ku noqo´´* Wiilkii oo ay ahayd markii *ugu* horaysay ee uu dhul Soomaaliyeed yimaaddo ayaa aad ula yaabay sida loogu diiday inuu galo meel uu lacagtiisii la baxay ayaa aroortii shandadihiisii ka qaatay.

56. Naa aabbahaa afkuu na qabtaye, adna ma futadaad na qaban?

Nin reer Banaadir ah oo murti iyo xigmad badan looga bartay, gayigaasina caan ka ahaa ayaa beri waxa ay gaadhi wada fuuleen gabadh uu dhalay Alle ha u naxariistee Madaxweynihii hore ee Soomaaliya Maxamed Siyaad Barre. Ninkii ayaa waxaa ka fakaday naqas. Gabadhii uu Madaxweynuhu dhalay oo agtiisa fadhiday ayaa ku tidhi, `` *Uf... uf.. ee naga daa dhuusada´´* Ninkii inta uu si qalafsan gabadhii u eegay ayuu ku yidhi, `` *Naa aabbahaa afkuu na qabtaye, adna ma futadaad na qaban?´´*

57. Laba nin oo waalan oo walaalo ah uun baan waraabinaayay

Nin qaadka aad u cuna ayaa waxa uu maalin la fadhiistay labba nin oo walaalo ah ay meel ka wada shaqayn jireen. Labbada nin ee walaalaha ahi waxa ay ahaayeen laba nin oo markay qayilayaan biyo cab badan. Ninka oo fadhiistey labada walaalaha ah dhexdooda ayaa ku daalay sidii uu kolba mid sufur biyo ah ugu dhiibayay, isagoo mararka qaarna inta uu kaco caag biyo ah u keenayay. Waxa uu sidii ku jiraba, goor fiidkii ah ayaa isaga oo daallan waxa uu isaga kacay meeshii uu nimanka kula qayilayay si uu u fadhiisto meel ka degan. Markii uu ka soo kacay makhaayaddii uu fadhiyay ayaa waxa uu jidka kula kulmay nin kale oo ay asxaab ahaayeen. Markii ay sheekaysteen sida uu fadhigoodii maantu ahaa, ayaa ninka makhaayada ka soo kacay isagoo cadho badani ka muuqato ku yidhi saaxiibkii, `` *Waar waxbana maanu mirqaamine, laba nin oo waalan oo walaalo ah uun baan maantoo dhan waraabinaayay´´*.

58. Kaadhkii Telefoonka

Daahir waxa uu ahaa nin ganacsade ah, waxaanu lahaa dukaan aad u weyn oo ku yaalla magaalada Hargeysa, waxaanu inta badan ka ganacsan jiray daawooyinka dumarku is mariyaan.
Daahir waxa uu ahaa nin bashaasha oo hablahoo dhammi jecel yihiin inay wax ka iibsadaan. Aamina waxa ay ahayd gabadh macmiisha dukaanka ka mida, waxaana ay aad isugu wanaagsanayeen Daahir oo haasaawe telefoonka u badan ayaa ka dhexeeyay. Haddaba maalin ayaa Aamina soo wacday Daahir oo maqalka dukaanka haya, waxa ayna Aamina ka codsatay inuu u soo diro kaadh ay telefoonka ku shubato maaddaama ayna lacagi ugu jirin telefoonka gacanta.

Waxa uu Daahir u yeedhay Cawaale oo gacanyarihiisa ahaa, waxaanuu u dhiibay lacag waxaanu u sheegay inuu u soo iibiyo kaadh telefoonka. Markii uu Cawaale kaadhkii u keenay ayuu Daahir kaadhkii xoqay waxaanu wacay Aamina oo uu u yeedhiyay tiradii kaadhka ku qornayd.

Intii uu u yeedhinayay ayaa Cawaale oo meel guluca ku jiraa isna dhankiisa ka qortay kaadhkii isla markiibana ku shubtay telefoonkiisii. Aamina ayaa markii ay sidaa u qoratay nambarkii kaadhka waxay isku dayday inay ku shubato laakiinse waxa uu kaadhkii u sheegay in la isticmaalay oo ayna u suuroobi karayn inay iyadu isticmaasho. Aamina oo yaaban ayaa telefoonkii Daahir markale soo wacday una sheegtay inuu siiyay nambar la isticmaalay.

Daahir waxa uu ahaa nin mashquulee, waxa Aamina u sheegay inuu ka xunyahay sida uu kaadhkii ugu shaqayn waayay waxaanu ka codsaday inay yara sugto si uu mid kale ugu soo iibiyo.

Waxa uu Daahir u yeedhay Cawaale yare waxaanu u dhiibay lacag kale si uu kaadh kale u soo iibiyo maaddaama uu kii hore xumaaday. Markii Cawaale kaadhkii keenayba waxa uu Daahir markale wacay Aamina waxaanu u yeedhiyay kaadhkii cusbaa isagoo kii hore hoosta dhigtay si uu dukaankii laga soo iibiyay ugu celiyo.

Intii uu Daahir kaadhkii labbaad u yeedhinayay Aamina, Cawaalana inta uu guluc yar galay ayuu dhankiisa ka qoranayay, markii uu Daahir yeedhintii dhameeyayna Cawaale waxa uu ahaa mid lacagtii telefoonkiisa ku jirto.

Aamina ayaa is tidhi ku shubbo mise waaba sidii markii hore oo kale, iyadoo yaaban ayay haddana la soo hadashay Daahir una sheegtay inaanu kaadhkii labaadna shaqaynayn. Daahir oo yaaban ayaa inta uu kaadhkii hoosta dhigay u yeedhay Cawaale una diray kaadh saddexaad.

Markii uu Cawaale kaadhkii keenay ayuu haddana Daahir u yeedhiyay Aamina kaadhkii seddexaad, isla sidii hore u dhacday

ayuunbuu haddana Cawaale halkii ka miisay oo uu tiradii uu Daahir ku dhawaaqayay qortay. Cabbaar kadib ayaa Aamina oo daal iyo rafaad ka muuqdaa ku soo celisay ninkii Daahir oo shaqo badan ku jira, markii uu telefoonkii ka qabtayna waxa ay u sheegtay in kaadhkii seddexaadna u shaqayn la' yahay. Daahir oo xanaaqsan ayaa ku yidhi, `` *Naa malaha inaad na kicisaad doonaysaaye mar danbe hayla soo hadlin*. ´´ Halkii bay Daahir iyo Aamini ku kala xidhiidh furteen.

59. Waar naga tag waxba kaa durki maynee, ilaa saakuun baad na lahayd iskuuse

Nin reer waqooyi ah ayaa beri gaadhi ka raacay magaaalada Muqdisho isaga oo u socday magaalada Baydhabo. Gaadhigu waxa uu ahaa nooca baska loo yaqaano e, waxaa dhinaciisa fadhiyay nin reer banaadir ah. Gaadhiga oo dad badani saarnaayeen oo cidhiidhi ahaa awgeed ayaa markasta ninka reer Banaadirka ahi waxa uu ku lahaa ninka reer Waqooyiga ah, `` *Excuse me´´* oo ah kalmad Ingiriisi ah oo micnaheedu yahay, `` *Iga raali ahow*. ´´ Ninka reer waqooyiga ahaa oo si kale u fahmay ayaa u qaatay in uu ninku ku leeyahay, `` *Is kuus´´*, markasta oo 'excuse me' lagu yidhaahdo na wuu ka sii durkayay isagoo u qaadanayay in uu ninku ula jeedo iga durug. Waxa uu ninkii reer Waqooyiga ahaa is kuuso oo uu dhanka daaqada isku nababa, goor xilli danbe ah oo ay magaalada Baydhabo u soo dhaw yihiin ayaa gaadhigii meel dhagaxaan badan maray oo uu yara ruxmay. Ninkii reer Banaadirka ahaa oo raali galinaya ninkii reer Waqooyiga ahaa maaddaama uu ku ciiray ayaa haddana ku yidhi, `` *Excuse me*.´´ Ninkii reer Waqooyiga ahaa oo goorahaaba cadhaysnaa ayaa inta uu feedh u duubto ku odhanaya, `` *Waar naga tag waxba kaa durki maynee, ilaa saakuun baad na lahayd iskuuse.´´*

60. **Wallee aniga tibtaa dabada igama galisid**

Maalin ayaa nin miskiin ahi waxa uu soo hor maray gabadh yar oo gurigooda hortiisa maacuun ku dhaqaysa, iyada oo gacanta ku haysa oo ay maydhaysa Tibta xawaashka. Miskiinku waxa uu waligii jeclaa in uu helo tib lacag la'aan ah. Inta uu gabadhii soo ag istaagey ayaa waxa uu ku yidhi, " *Adeer tibtan maad isiin?´´*. Gabadhii yarayd baa ugu jawaabtay, " *Adeer tibtaan aabbehay ayaa iska leh, oo qofkii ay islaayaan ayuu dabada ka galiyaa*." Ninkii markii uu intaa maqlay ayuu horay ka sii dhaqaaqay.
Gabadha aabbeheed oo gudaha guriga ku jiray ayaa waxa uu maqlay hadalkii gabadha iyo Miskiinka, Inta uu soo baxay ayaa uu gabadhii ku yidhi, " *Aabbo muxuu ku weydiistey*?" " *Aabbe waxa uu I waydiistay inaan tibta siiyo, ana waxaan ku idhi, aabbehay baa leh.*" ayey ku jawaabtay. Gabadha aabbeheed oo ahaa nin naxariis badan ayaa inantiisii ku yidhi, `` *Aabbe maxaa aad u siin wayday?*" Odaygii waxa uu arkay miskiinkii oo sii socda. Inta uu tibtii ka daba qaaday ayuu u dhawaaqay si uu siiyo. Ninka miskiinka ah waxaa ku qufulnayd inuu odaygu tibta dadka dabada ka galiyo'e, inta uu cararay ayuu yidhi, `` *Wallee aniga tibtaa dabada igama galisid*! ´´

61. **Oo ma feedhka uun baad arkaysay?**

Maalin ayaa waxaa is laayay laba nin oo qaadlayaal ah. Waa ay kala xoog weynaayeene mid baa feedh lagu daandaamiyay. Intii feedhka lala dhacaayey isna wuu caytamaayey uun. Markii dadkii ku soo yaaceen ee la kala qabtay, kii laga adkaaday oo weli caytamaaya ayaa saaxiibkii ku yidhi, `` *Waar maxaa aad ninka isaga celin wayday?´´* Inta uu qoslay ayuu ugu jawaabay, `` *Gaw! Oo ma feedhka uun baad arkaysay, miyaanad arkayn wixii cay afkayga ka baxaysay?´´*

62. **Anigaa daldalay**

Xarun lagu daryeelo dadka xanuunka dhimirka qaba, ayaa maalin nin ka mid ahaa raggii maskaxda ka xanuunsanayay inta uu qolkiisii ka baxay waxa uu isku tuuray barkad biyo ah oo u dhawayd. Warsame oo isna ka mid ahaa raggii meesha lagu hayay oo isagu yar ladnaa dhex wareegayayna dhakhtarka ayaa arkay ninka barkada ku dhacay. Waxa uu ahaa nin dabbaasha ku fiicane isla markiiba barkadii buu ka soo saaray saaxiibkii, waxaanu geeyay geed hoostii. Cabbaar ka dib ayaa inta uu xadhig soo qaatay qoorta kaga xidhay saaxiibkii geedkiina ka soo laadlaadiyay.

Mar danbe ayaa dhakhtarkii tabay ninkii geedka laga soo laadlaadiyay, waxaanu waydiiyay
Warsame in uu war ka hayo iyo in kale. Halkii uu dhakhtarkii jawaab kale ka sugayay ayuun buu Warsame ugu jawaabay, `` *Haa barkadaan ka soo saaroo waxaan ka soo daldalay geedkaa, si uu u qallalo.´´*

63. **Dhakhtaroow adna iska dhaadhici inaan lacagtii ku siiyay**

Nin baa maalin dhakhtar u tagey. Dhakhtarkii ayaa ninkii baadhitaan ku sameeyey su'aalana weydiiyey si uu u ogaado cudurka haya iyo noociisa. Kadib baadhitaan dheer dhakhtarkii waxa uu ogaaday in uu ninku qabo cuqdad-nafsi ee aanu jirin cudur kaloo hayaa, waxaanu dhakhtarkii ninkii ku yidhi, " Waxaan kugula talinayaa inaad iska dhaadhicisid in aanad xanuunsanayn.´´ Ninkii oo ka yaabay hadalkii dhakhtarka ayaa ugu jawaabay, " Waa hagaag dhakhtaroow", kadibna markii uu damcay inuu baxo ayaa dhakhtarkii ku yidhi, " *Walaal inta aanad tagin lacagtii baadhitaanka i sii*.´´ Halkii uu lacagtii ka bixin lahaa ayaa inta uu

dhaqaaqay waxa dhakhtarkii ku yidhi, `` *Dhakhtaroow adna iska dhaadhici inaan lacagtii ku siiyay.´´*

64. **Dukaankii kacay**

Quule waxa uu ahaa nin reer magaal ah, waxaana uu lahaa dukaan yar oo uu masaariifta reerkiisa kala soo baxo. Beri danbe ayaa dukaankii ka kacay, waxaana soo wajahday busaarad xoog leh, muddo yar kadibna waxa ay kala tageen xaaskiisii. Markii ay talo ku caddaatay ayaa waxa uu goostay in uu la xidhiidho nin ay saaxiib ahaan jireen oo qurbaha ku maqnaa, si uu u soo caawiyo oo uu lacag ugu soo diro. Markii uu la hadlay ayaa ninkii u balan qaaday in uu lacag u soo diri doono, nasiibdarrose ninkii waxba uma uu soo dirin. Markii uu in muddo ah ka war dhowrayay ee uu war ka waayay ayuu maalintii danbe soo qaatay qalin iyo warqad waxaanuu u qoray warqad isagoo duruuftiisa nololeed uga waramaya, una sheegaya inuu luggooyay. Maaddaama oo saaxiibkii qurbaha in badan degganaa waxa uu jeclaystay in uu af Ingiriisi warqadda ku qoro, waxaanuu u qoray sidan: ”*my shop stands up, I opened my wife and you cut my leg.”* Taas oo uu ka soo tarjumay luqada Soomaaliga. (Dukaankii *wuu kacay, Xaaskaygiina waan furay adna waad I lug goysey).*

65. **Bakhaylkii iyo caanihii**

Warfaa waxa uu ahaa nin gacan adag, oo aan cidna fijaan shaaha u shubin, waanuu ka tilmaamnaa beeshiisa, oo xitaa masaakiintu waxba may waydiisan jirin. Maalin ayaa nin dawarsanayaa soo garaacay albaabkiisii. Warfaa ayaa inta uu albaabkii furay waxa uu miskiinkii siiyay maddiibad caano ah. Miskiinkii oo u qaadan waayey sida uu maanta Warfaa wax u siiyay, ee uu waliba caano u

siiyay ayaa isaga oo aan neefsan inta uu markaliya caanihii laacay Warfaa ku yidhi, `` *Oo Adeer haddaa maxay dadku bakhaylnimada kuugu sheegaan nin wanaagsan oo gacan furan baad tahaye?* Sow beri hore kuumaan imaadeen´´ Warfaa ayaa inta uu qoslay ugu jawaabay,`` *Adeer been igamay sheegine, haddii aanay caanahaa qoroto ku dhici lahayn iga wallee inaanad calafsateen.´´*

66. **Aboowe maxaad sheegtay?**

Beri ayaa nin reer Waqooyi ah oo Muqdisho jooga waxa ay is barteen gabadh reer Banaadir ah. Gabadhu markasta waxay ku odhan jirtay aboowe macaane, ninkii waxa uu garan waayay macnaha kalmadda Aboowe, waxaanu waydiiyay nin kale oo ay asxaab ahaayeen, waxaanu ninkii kale u sheegay inay micnaheedu tahay ´´*Walaal*.´´ Maalin kale ayaa ninkii oo suuqa jooga waxa ay iska soo hor baxeen gabadhii oo hooyadeed la socota. Markiiba inta uu ninkii reer Waqooyiga ahaa dhoolla cadeeyay ayuu gabadhii ku yidhi, `` A*boowe maxaad sheegtay*?´´ **67 . Abaayo sheeko miyaa?**

Nin reer Xamar ah ayaa beri safar ku tegay magaalada Hargeysa, waxaanu ku degay hudheel dadka martida ah loogu talo galay. Aroortii danbe ayaa waxaa qolkiisii ku soo qaraacday gabadhii shaqaalaha ahayd iyada oo rabtay inay guriga nadiifiso. Markii uu albaabkii ka furayna waxa ay ku tidhi, `` *Walaal waxaan rabaa in aan qolka fiiqo ee ma soo bixi kartaa?´´* Ninkii oo yaaban ayaa gabadhii ugu jawaabay, `` *Abaayo sheeko miyaa?*, Anii qolkan hal bilaan kiraystay nooh.´´

68. **Oo dee haddaa is dhiiba**

Uurdoox waxa uu ahaa nin gaaban oo waliba weyd ah. Xilli ku beegan dabayaaqadii lixdamaadkii ayuu damcay in uu askari noqdo, waxaanuu u tegay wasaaraddii gaashaandhiga si uu askari u noqdo. Madaxdii xafiiska fadhiday ayaa Uurdoox u sheegay inaanu askari noqon karin, maaddaama oo uu nin gaaban oo weyd ah yahay oo aanu qori qaadi Karin. Halkii baa Uurdoox oo niyad jabsani iskaga huleelay. Muddo kadib xilli ku beegan 1977 ayaa Uurdoox oo wakhti fiida u sii carraabaya reerkiisii waxaa qabtay askar magaalada gaaf wareegaysay. Markii uu Uurdoox waydiiyay sababta loo qabtayna waxa ay askartii u sheegeen in uu ka qayb galayo dagaalkii Itoobiya lagula jiray. Uurdoox oo yaaban ayaa askartii u sheegay inaanu isagu askari noqon karin oo horeba loogu diiday. Mid ka mid ah taliyayaashii ciidanka ayaa Uurdoox ugu war celiyay in waddanku u baahan yahay maanta. Uurdoox ayaa inta uu qoslay ugu jawaabay, `` *Oo dee haddaa is dhiiba*.´´

69. **Waad igu ogtahay**

Islaan da'ah oo wajigeeda dhalaal iyo qurux dabicii ahi ka muuqato ayaa gabadh dhallinyaro ahi u timid oo ku tidhi, "Eddo *wajigaagan quruxda badan daawadee ayaad ku qurxisay*?" Islaantii ayaa ugu jawaabtay " *Dibnahayga waxa aan ku adeegsadaa xusida Alle (S.W.T), indhahaygana waxa aan ka qarsadaa xumaha, gacmahaygana waxa aan u adeegsadaa samofal, boggaygana waxa aan u adeegsadaa toosnaan, qalbigaygana waxa aan u adeegsadaa jacaylka*
Alle (S.W.T), caqligaygana waxa aan u adeegsadaa xikmadda, naftaydana adeecidda Alle
(S.W.T)" Inantii gashaantida ahayd inta ay la dhacday ayay tidhi "*Waad igu ogtahay*."

70. Saaxiib qof kastaaba wuu isla sheekaystaa

Aadamaha ayaa sidiisaba lagu tilmaamaa in uu yahay mid markasta maskaxdiisu shaqo hayso, ha kala duwanaadeen waayaha uu qofku ku sugan yahaye, waxaana la yidhaa marka kaliya ee qofka bini aadamka ah maskaxdiisu nasataa in ay tahay marka uu hurdo waaba haddii ay iyana riyo ka badbaado'e. Haddaba nin ku caan ahaa in uu isla sheekaysto marka uu kaligii waddooyinka marayo ayaa maalintii danbe nin kale oo ay saaxiib ahaayeen waydiiyay waxa uu iskula sheekaysto. Meel fogba jawaabtii kama uusan doonine waxa uu ugu hal celiyay, `` *Saaxiib qof kastaaba wuu isla sheekaystaa, laakiinse anigu tayda waan is maqashiiyaa uun.´´*

71. Waxaan ahay maalka la doon doonayo

Mooge, xaaskiisa iyo carruurtiisa oo safar ku gudojira, ayaa waxa ay la kulmeen nin waddada dhex taagan, waxaana ay weydiiyeen ninkii waddada taagnaa, "*kumaad tahay*?" Ninkii ayaa ugu jawaabay, "*Waxaan ahay maalka la doon doonayo."*

Ninkii xaaskiisii iyo carruurtiisa ayuu ku yidhi, "*Ma u oggolannaa in uu gaadhiga nala soo fuulo?"* Waxa ay dhammaantood ugu jawaabeen, *'Haa, waan doonaynaa, maalku ma wax la diidaa!"*

Gaadhigii ayuu la fuulay. Waqti yar markii ay socdeen waddada waxa ay ku arkeen nin kale oo taagan. Mooge ayaa ninkii ku yidhi; "*Kumaad ahayd?*" Ninkii waddada taagnaa, ayaa ku jawaabay; "*Waxaan ahay xilka iyo talada*."

Mooge ayaa xaaskiisii iyo carruurtiisii ku yidhi; "*Ma qaadnaa mise waan ka tagnaa*?" Cod qudha ayey ku yidhahaadeen, "*Haa, talada iyo xilka wax kasta ayaan ku gaadhaynaa oo aan doonayno.*"

Sidaasu gaadhiga ku raacay xilkii iyo taladii. Intii safarka ay ku gudo jireenna waddada waxa ay kula kulmeen shakhsiyaad kala duwan oo iyaguna magacyo xambaarsan.

Waxa ay socdaan ugu dambeyntii wuxuu la kulmay nin uu ku yidhi; "*Ku maad ahayd*?" Ninkii ayaa ugu jawaabay; "*Waxaan ahay diinta*." Mooge ayaa haddana xaaskiisii iyo carruurtiisii, *"ma qaadnaa*?" waxa ayna mar qudha yidhaahdeen, "*Waqtigan looma baahna, waxaan doonaynaa adduunyada iyo raaxadeeda diintuna way naga mashquulinaysaa, waxaan jecelnahay waqti kale oo iminka aan ahayn in aanu diinta la kulanno."*

Sidaa ayey kaga dhaqaaqeen, waqti yar kadibna waxa ay ka war heleen jidgooyo iyo iyaga oo lagu yidhi joojiya gaadhiga, nin ayaana farta ku fiiqay Mooge oo ku yidhi ka soo deg gaadhiga, waxaanuu ku yidhi Mooge " *waxaan doondoonayaa diinta?"* Mooge ayaa uga jawaabay; "*Waddada ayaan ku soo dhaafay, haddaad doonto waan kuu geynayaa."*

Ninkii ayaa ku jawaabay ma kartid arrintaa, safarkaaga nolosha wuu soo gebagaboobay, dibna uma laaban kartid marna. Mooge wuxuu yidhi; "*Gaadhiga waxa aan ku sidaa maalka, xilka iyo talada iyo xaaskayga iyo carruurtayda.* Ninkii ayaa inta uu hadalkii ka kala gooyey ku yidhi; "*Dhammaan waxa aad xustay waxba kagama tari karaan xagga Alle (SWT*) . Mooge oo yaaban ayaa ninkii waxa uu ku yidhi maxaad ahayd? Wuxuu ku jawaabay; "*Waxaan ahay geeridii, aad iska ilowday oo aanad u diyaargaroobin."*

72. **Safarkii Saxaraha**

Laba nin oo saaxiib ah oo meel saxare ah marayey ayaa khilaaf soo dhex galay. Dabadeed mid ayaa kii kale dhirbaaxo kulul ku jiiday. Kii dhirbaaxada lagu dhuftay ayaa ciiddii casayd ee lamadagaanka

ku dul qoray"maanta waxa I dhirbaaxay saaxiibkii adduunka iigu qaalisanaa. Kadib waxa ay sii wateen safarkoodii. Markii ay soo gaadheen tuulo yar oo webi ku yaal ayey labadii nin waxa ay go'aansadeen webiga in ay ku maydhaan. Markii ay galayeen biyihii webiga waxa biyihii ku dhex dhacay oo ku haftay kii markii hore la dhirbaaxay. Si degdeg ah waxa ugu gurmaday saaxiibkii oo dirqi ku soo badbaadiyey.

Dabadeed, gidaar weyn oo ku yaal tuulada waxa uu ku qoray "maanta webi baa iqaaday waxaana iga soo badbaadiyey saaxiibkayga qaaliga ah." Kii kale ayaa waydiiyay; "*Maxaa aad markii aan ku dhirbaaxay aad camuudda uga dul qortay markii aan ku badbaadiyeyna gidaarka*?" Wuxuu ku jawaabay, "*Marka saaxiibkaa gef ka dhaco waa in aad camuudda ku qortaa, si muddo kaddib dabayshu u qaado, cadhaduna ay meesha uga baxdo. Marka uu wanaag kuu falana waa in aad ku qortaa meel ayna ka masaxmayn."*

73. **Waar kabahaagii wali maan samayn, oo masaabiirtii oo aan radiyay ayaa wali qoyaysa**

Nin kabatole ah ayaa waxa u yimid nin reer miyi ah oo u baahan in kabaha loo tolo. Kabatolihii ayaa inta uu kabihii ninkii ka qaaday ballamiyay maalin kale si uu kabaha u soo doonto iyaga oo diyaar ah. Laba cisho kadib ayaa ninkii reer miyiga ahaa kabatolihii ku soo noqday waydiiyeyna inuu kabahii u dhameeyay. Ninkii kabatoleha ahaa oo aan ballantii ka soo bixin oo aan wali kabihii gacan u gaysan ayaa inta uu naxay waxa uu ninkii reer miyiga ahaa ku yidhi, `` Waar *kabahaagii wali maan samayn, oo masaabiirtii oo aan radiyay ayaa wali qoyaysa.´´*

74. **Ninkaan ku waa lahayn baa Midgaan ah**

Nin beelaha la hayb sooco ka dhashay oo sarkaal sare oo millateri ahaa xilligii Kacaanka ayaa nin kale ku yidhi' *Midgaan*', Inta uu xiddigihii darajada ee garabkiisa ku taxnaa taabtay buu yidhi, `` *Ninkaan ku waa lahayn baa Midgaan ah*.´´

75. **Maxay aniga igu diideen?**

Nin suxufi ah oo beelaha la hayb sooco ka dhashay ayaa maalin arkay nin naafo ah oo cabanaya. Wuxuu ku yidhi, ``*Adigu naafo ayaabad tahay oo wax lagugu diidaa jira e aniga oo qof dhan ah oo soo taagan maxay igu diideen?*´´

Nin qurbaha ku nooloo

Qaarad kale u guuroo

Qaxoontiga naf moodoo
Qulub uu ku dhacayoo
Ehel iyo qaraababa
Qarni hore ilaaboo
Walbahaarka qaalibay
Qosol kii ku beeriyo
Buug weeye qaaliya
Qormo weeye maadlee
Qamareey bal ila eeg.

Qoraha Buugga: Muuse Dalmar

QAYBTA 3AAD

Sheekooyin murtiyeed qosol badan oo ka dhacay Qurbaha

1. Waar waxaa i helay from xoor to xoor

Warfaa oo ahaa nin ganacsade ah ayaa waxa uu muddo badan ku noolaa waddanka Saambiya, halkaasi oo uu ganacsi weyn ku lahaa. Markii ganacsigiisii weynaaday ayaa waxa uu u baahday wax la shaqeeya, waxaanu waddankii ka soo kaxeeyay dhowr nin oo ay ilmaadeer ahaayeen oo qaar reer baadiye ahaayeen. Mihiimaddiisu waxa ay ahayd inay xoolaha dhulka shisheeyaha ah yaala la maamulaan. Muddo markii ay nimankii la shaqeeyeen ayaa waxay noqon waayeen sidii uu rabay, oo qaar raggii ka mid ahi waxay bilaabeen balwado aan fiicnayn, ganacsigii iyo tijaaradii Warfaana markaliya ayay hoos u dhacday. Maalin danbe ayaa nin ay Warfaa saaxiib ahaayeen la kaftamay oo ku yidhi, `` *Waar maxaa baayac-mushtarkaagii ku dhacay waadigan kacaye*?´´ Warfaa oo arkay in hadalka ninku run yahay ayaa ugu jawaabay, `` *Waar waxaa i helay from xoor to xoor´´* oo uu ula jeeday in nimankii ilmaadeeradii ahaa ee la shaqaynayay ay reer baadiye xoorkii geela ka yimid oo xoorkii khamriga u yimid ahaayeen.

2. Waar ha gubtee, gaaladii ku dhex jirtayna sow lamay guban?

Islaan Soomaaliyad ah ayaa waxa ay carruurteedii geysay waddanka Maraykanka. Maadaama ay carruurteedu u qaybsanaayeen qaar waxbarashada taga iyo qaar shaqeeyaba waxay ahaayeen kuwo aroortiina kalaha habeenkiina xilli danbe soo hoyda, waxaanay

islaantii kali ku noqotay gurigii. Islaantu waxay madadaalo ka dhigan jirtay telefiishanka oo ay daawan jirtay hadba wixii soo gala. Maalin danbe ayaa islaanta wiilkeedii oo xadhigii dabka hagaajinaya waxa gubtay telefiishankii. Islaantii ayaa inta ay qolkeedii ka soo booday waydiisay wiilkeedii waxa gubtay,
`` *Telefiishankii baa gubtay hooyo´´*
`` *Waar ha gubtee, gaaladii ku dhex jirtayna sow lamay guban?´´*.

3. Waxba maanan sheegin

Aniisa yar oo ka mid ah carruurta Soomaaliyeed ee ku dhalatay qurbaha, gaar ahaan dalka Iswiidhan, ayaa maalin waxaa gurigooda soo booqday oday u adeer ah. Markii uu guriga soo galay ayaa waxa uu albaabka kula kulmay Aniisa, isagoo salaamayana waxa uu ku yidhi, `` *Adeer maxaad sheegtay*?´´ Aniisa yar inta ay naxday oo ay hoos u foorarsatay ayey ugu jawaabtay, `` *Waxba maanan sheegin´´,* waxay salaantii u qaadatay in uu adeerkeed waydiinayo inay war cid kale u sheegtay iyo in kale.

4. Hooyo Ey ii soo iibi

Wiil yar oo Soomaali ah kana mid ah carruurta Soomaaliyeed ee Qurbaha ku dhalatay, gaar ahaan dalka Maraykanka, ayaa waxa ay dugsiga wada dhigan jireen carruur badan oo Maraykan ah. Carruurtaasi ayaa intooda badani waxa ay lahaayeen Ey ay carbistaan, waxaanay mararka qaar la yimaaddaan Dugsiga. Waa carruur iyo caadkeed oo way isku dayataaye, wiilkii Soomaaliga ahaa isna waxa uu jeclaystay inuu sida qayrkii uu helo Ey uu la ciyaaro. Wuxuu aamusnaadaba maalintii danbe ayaa isaga oo iskuulkii ka soo rawaxay waxaa isaga iyo hooyadii dhex martay sheekadan:

Wiilkii: *Hooyo Ey ii soo iibi. Ciyaalkii qayrkay ahaa oo dhami Ey bay leeyihiine.*

Hooyo: *Alla bisinka! Hooyo Muslim baynu inagu nahay, diinteenuna inooma ogola Eyga.*

Wiilkii: *Inta uu yara aamusay ayuu haddana ugu war celiyay, `` Dee waayee hooyo haddaba Ey Muslima noo soo iibi´´.*

Hooyo: *Alla hoogay! hooyo Ey Muslim ahi ma jiro.*

5. Diinta Soomaalidaan qaadanayaa

Gabadh Soomaaliyeed oo ku nool dalka Iswiidhan ayaa waxa ay is jeclaadeen nin Iswiidhish ah oo ay in badan wada shaqaynayeen. Ninka Iswiidhishka ahaa ayaa gabadhii u soo bandhigay inay is guursadaan. Haddaba gabadhii oo soo dhawaysay codsigiisa ayaa waxa ay shuruud uga dhigtay inuu marka hore muslimo. Ninkii oo hadalkeedii soo dhaweeyay ayaa ugu jawaabay sidan, `` Waayahay *macaan waan Muslimayaa, laakiinse diinta Soomaalidaan qaadanayaa*.`` Gabadhii ayaa inta ay yaabtay waydiisay waxa uu uga jeedo diinta Soomaalida. Waxa uu u sheegay inuu arkay rag badan oo Soomaali ah oo markay doonaan khamriga caba markay doonaana salaada tukada.

6. Alla eddo caadi ma tihid

Dhalan-rogga ku dhacay luuqada Soomaaligu waxa uu ka mid yahay dhibaatooyinka ay bulshadeennu la kulantay muddooyinkii u danbeeyay. Ha u sii badnaato qurbaha'e waxaa mararka qaar dhacda inaanay is fahmin dadkii waa weynaa iyo dhallintii. Nimco waxay ka mid tahay Caruurta Soomaaliyeed ee qurbaha ku kortay, maalin

ayaa waxa gurigooda timi Saado oo ah islaan ay deris yihiin. Nimco oo jeclayd la sheekaysiga dadka waaweyn ayaa waxa ay u timi Saado. Markii ay cabbaar wada sheekaysteen ee ay Nimco sheekadii islaanta ka heshay ayay ku tidhi, `` *Alla eddo caadi ma tihid´´* Saado oo hadalkaasi la yaabtay oo qoonsatay ayaa gurigii ka baxday. Maalin danbe ayay Saado la kulantay Nimco hooyadeed waxaanay u sheegtay inay Nimco si xun ula hadashay oo ay ku tidhi, `` *Waad waalan tahay´´.*

7. Hooyo carruurta iskuulka ayaa igu odhanaya, hooyadaa dharkii jiilaalkay xidhan tahay

Wiil yar oo Soomaali ah oo ka mid ah carruurta ku kortay qurbaha ayaa maalin waxa uu macallinkiisii dugsigu u diray inuu u yeedho waalidkii, si uu uga soo qayb galo shir ay waalidiintu lahaayeen oo dugsiga ka dhacayay. Wiilkii waxa uu farriintii gaadhsiiyay hooyadii, iyana waa ay ka aqbashay waxaana ay u sheegtay in ay ka daba iman doonto. Goor barqinkii ah ayaa wiilka hooyadii timi dugsigii. Wiilkii oo la ciyaaraya carruurtii ay isku fasalka ahaayeen ayaa waxa uu isha ku dhuftay hooyadii oo albaabkii dibada ka soo galaysa, isla markiibana orod buu cagaha wax ka dayay isaga oo hooyadii ka dhuumanaya. Islaantii ayaa hore u arki wayday wiilkeedii, waxaanay waydiisay carruurtii ay saaxiibka ahaayeen, waxaanay u sheegeen inuu wiilkeedii ka dhuuntay. Hooyadii oo ayna u suuro galin inay wiilkeedii la kulanto ayaa gurigii iskaga soo noqotay. Goor galabtii ah markii uu wiilkeedii soo hoyday ayay waydiisay xaga uu maanta ka dhacay. Wiilkii oo aan jawaabtii meel fog ka deyin ayaa ugu jawaabay, `` *Waan kaa dhuuntay´´*. Hooyadii ayaa inta ay naxday waydiisay waxa uu uga dhuuntay, waxaanu ugu jawaabay, `` *Hooyo carruurta iskuulka ayaa igu odhanaya, hooyadaa dharkii jiilaalkay xidhan tahay (Winter), ileen hada waa xagaaye.* Hooyadii oo u qaadan wayday hadalka inankeeda ayaa ku tidhi, `` *Hooyo haddaba dee daba-gaab ma soo xidhaa*?´´ Wiilkii ayaa inta uu cabbaar aamusay oo uu madaxa ruxay yidhi, `` *Maya*

hooyo, taasna carruurta Soomaalida ayaa igu caayaysa ee ha ii imane guriga iska joog´´.

8. Muxuu bayshan u qaadan waayay?

Wiil yar oo Soomaali ah kana mid ah carruurta Soomaalida ah ee waddanka Iswiidhan ku kortay ayaa maalin isaga oo hooyadii qolka fadhiga la fadhiya waxa soo dhacay telefoonkii guriga. Islaantii ayaa telefoonkii qabatay, markii ay helo tidhina waxaa uu qofkii soo hadlayay noqday oday u adeera oo Soomaaliya jooga. Waa la wada sheekaystay. Odaygii Soomaaliya joogay ayaa u xaal waramay islaantii, una sheegay inuu xaalkiisu iska liito oo ay hadda da' iyo xanuunba iskugu darsameen, iyadoo ay waliba u sii dheertahay duruuf dhaqaale. Markii ay telefoonkii dhamaysteen ayaa islaantii iska calaacashay, iyada oo muujinaysa sida ay uga xuntahay inaanay adeerkeed caawin karin. Wiilkeedii oo agteeda fadhiya ayaa maqlay tawaawaca hooyadii, waxaanu weydiiyay cidda ay la hadlaysay. Islaantii ayaa ugu jawaabtay, `` Waxaan la hadlaayay adeerkay oo waddankii jooga. Walaahi waa uu iska darxumaysan yahay oo hadda da'na way haysaa xanuuna wuu u raacaa. Ana maanta waxaan u qaban karaa ma jirto.´´ Wiilkii ayaa hooyadii ugu hal celiyay, `` *Oo hooyo adeerkaa waa imisa jir?´´*, hooyadii ayaa wiilkeedii ugu jawaabtay, `` *Waa 70 jir´´* Wiilkii oo hadalka hooyadii la yaabay ayaa ugu hal celiyay, `` *Oo hooyo haddaa muxuu bayshan u qaadan waayay? (Pension).*

9. Maxaad ka shaqaysaa?

Caydiid waxa uu dalka Iswiidhan soo galay horraantii sagaashamaadkii. Markii uu Soomaaliya joogay waxa uu ahaa nin ganacsade ah oo Ilaahay hayn adduunyo siiyay. Sidaa daraadeed markii hore waa uu la qabsan waayay nolosha adag ee qurbaha.

Laakiinse dani waa seeto'e waxa uu u babac dhigay noloshii cusbayd ee uu la soo darsay, waxa aanuu bilaabay inuu xoogsado oo uu qabto shaqooyinka hoose ee ay inta badan dadka ajaanibka ahi qabtaan, waxaanu nadiifiye ka noqday xafiis shirkadeed. Markii uu in muddo ah shaqadaas waday ayaa mar waxa uu safar ku tagay dalka Maraykanka oo qaar ka mid ah qaraabadiisu degan tahay. Markii uu dhowr cisho joogay magaalada Miniyaabulis ayaa waxa uu maalin la qayilay niman badan oo ay asxaab hore isku ahaayeen markii ay wada joogeen Soomaaliya. Markii lays waraystay ee uu nin kastaaba xaaladdiisa nololeed ka sheekeeyay iyo halka uu adduunka kaga nool yahay ayaa la soo gaadhay Caydiid. Caydiid oo sheekada saaxiibadii aad u xiisaynayay jeclaana inuu xaalkiisa uga waramo ayaa ka yara khashaafay oo ka xishooday inuu sheego shaqada uu Yurub ka hayo, isagoo arkayay shaqooyinka sar sare ee ay saaxiibadii Maraykan ka hayaan, waxaanu nimankii ku yidhi,

`` *Waaryaadheen ilmaadeerayaal aniga wax kastaba I waydiiyoo, maxaad ka shaqaysaa uun hay odhanina´´.*

10. **Isfahamdarro**

Dadka Soomaalidu markii qurbaha soo galeen waxay kala kulmeen dhibaato aad u weyn, taasi oo ay ka mid tahay sidii ay isku fahmi lahaayeen bulshooyinka cusub ee ay u yimaadeen.

Haddaba barashada luuqadaha ayaa ka mid ah dhibaatooyinka ay Soomaalidu la kulantay.

Nin Soomaaliya ayaa waxa uu waddanka Iswiidhan soo galay 1990 kii, maalin ayaa waxa uu galay dukaan si uu uga iibsado cunto. Markii uu soo istaagay meeshii lacagta lagu bixinayay ee uu gabadhii maqalka haysay lacagtii u dhiibay ayay ku tidhi, `` *tack´´* oo micnaheedu yahay mahadsanid. Ninkii ayaa inta uu naxay waxa uu mooday inay gabadhu ku leedahay meesha ka tag, inta uu baaqigiisii qaatay ayuu cagaha wax ka dayay.

11. **Hees Qaraami ah**

Horaantii sagaashameedyadii markii ay dawladdii Soomaaliya burburtay, Soomaali tiro badan ayaa waxay qaxooti ka noqotay wadamada reer galbeedka.

Haddaba markii ay Soomaalidii ugu horraysay soo gashay waddanka Denmark, ayaa dhallinyaro Soomaaliyeed waxay abaabuleen sidii ay u samayn lahaayeen Idaacad afka Soomaaliga ku hadasha oo bulshada Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool wacyi galisa, wayna u suuro gashay. Maaddaama oo ay Dhallinyaradu waddanka ku cusbayd waxay farsamayaqaanada la shaqaynaya isku af garan jireen faraha iyo iyaga oo marmarka qaar Ingiriisi jajaba ku wada hadli jiray.

Idaacadda oo lagu furi jiray aayadaha Quraanka ah ayaa maalin ninkii farsamayaqaanka ahaa xagii uu Quraanka ka galin lahaa ka galiyay hees qaraami ah, dhallinyarradii ayaa markaliya waxaa ka soo booday, `` *Alla Quraan maaha´´*.

12. **Wali maan qaan gaadhin**

Markii dawladdii dhexe ee Soomaaliya meesha ka baxday , burbur aad u laxaad leh ayaa ku dhacay bulshada Soomaaliyeed. Dad badan oo Soomaali ah ayaa u qaxay wadamada dariska ah sida Kiiniya iyo Itoobiya. Inkasta oo inta badan ee Soomaalida Kiiniya u qaxday ay galeen xeryooyinka qaxootiga haddana tiro badan ayaa waxay dageen oo ay nolol ka bilaabeen magaalooyinka waaweyn sida Nayroobi iyo Mumbaasa.

Haddaba Soomaalidii magaalooyinka waaweyn dagtey waxaa la soo daristay dhibaatooyin badan, ha ugu darnaato ta sharci

la'aantuye, qofkii Soomaali ah ee aan sharci haysanina waxa uu inta badan tacadiyo kala kulmaa booliska waddanka, iyagoo dariiqii uu qof Soomaali ahi marayaba istaajinaya sharcina waydiinaya hadduuna haysana ku qasbaya inuu lacag isku furto ama ay xabsiga u taxaabayaan.
Raage oo ahaa oday Soomaaliyeed oo ku cusub magaalada Nayroobi ayaa goor fiid ah isagoo sii caraabaya waxa uu la kulmay raxan booliis ah oo wada dad badan oo Soomaali iyo Itoobiyaan iskugu jira oo bilaa sharciya. Meel uu dib uga noqdona ma joogine halkiibaa la istaajiyay, saf dheer oo ay dadku ku jireena uu dabada qabsaday.

Booliskii oo dadkii u hanjabaya ayaa waxay bilaabeen inay dadkii qof qof u waydiiyaan sharcigiisii, waxay dadkii oo dhan soo maraanba waxay soo gaadheen wiil Soomaali ah oo Raage ka horeeyay, mid ka mid ah askartii oo afkiisa ku hadlaya ayaa wiilkii ku yidhi, `` *Leeta kibaadhiyaako´´*, oo macnaheedu yahay sharcigaagii keen. Wiil yar buu ahaaye wuxuu askarigii ugu jawaabay, `` *baadho fiiko´´*, oo micnaheedu tahay waan da yarahay (**Underage**), xaggii baa wiilkii lagu sii daayey. Raage oo waddanka ku cusbaa luuqada Sawaaxiligana aan aqoon ayaa waxa kaliya oo uu xafiday hadalkii uu wiilka yari askariga ku yidhi. Askarigii ayaa oday Raage soo gaadhay kuna yidhi, `` *Leeta kibaadhiyaako ´´*, oo macnaheedu tahay sharcigaagii keen. Oday Raage oo ay wali erayadii wiilka yari ka sii dhex guuxayaan ayaa askarigii ugu jawaabay, `` *Baadho fiiko* `` oo micnaheedu yahay wali carruurbaan ahay. Askarigii ayaa inta uu qoslay ku yidhi af-sawaaxili, `` *Orad oo iska tag* ``

13. Waxaan ahay Kurdi Soomaaliya ka yimid

Dhimbiil waxa uu ka mid ahaa dadkii Soomaaliyeed ee ugu horeeyay ee soo galay waddanka Iswiidhan.

Sida caadada ahayd Quule waxa uu bilaabay barashada afka Iswiidhishka, waxaanay isku fasal noqdeen arday badan oo iyaguna waddanka ku cusbaa oo iyaguna sidiisoo kale qaxoonti ahaa. Waxay ahayd maalintii u horaysaye, macallimadii ayaa waxay bilowday inay ardaydii is barto, waxaanay qof qof u waydiisay magaciisa iyo waddanka uu ka yimid. Ardaygii koowaad ayaa ku jawaabay, `` *Jag heter Ali, jag är Kurdi från Iraq´´*, oo macnaheedu tahay, ``*Magacaygu waa Ali*, waxaanan ahay Kurdi ka yimid wadanka Iraq´´, kii labaad ayaa isna ku jawaabay, `` *Jag heter Sami, jag är Kurdi från Iran*``, oo macnaheedu tahay, `` *Magacaygu waa Sami waxaanan ahay Kurdi ka yimid Iran´´*, kii saddexaad ayaa isna ku jawaabay, `` *Jag heter Samir, jag är Kurdi från Suriya*`` , oo macnaheedu tahay, ``*Magacaygu waa Samir, waxaanan ahay Kurdi ka yimid Suuriya´´*, waxa la soo gaadhay Quule, isagoo ardaydii is barayana waxa uu af Iswiidhish ku yidhi, `` *Magacaygu waa Quule, waxaan ahay Kurdi ka yimid Soomaaliya´´*, ardaydii ayaa mar kaliya ku wada qososhay. Waxaanay waydiiyeen inay Soomaaliya ku nool yihiin qoomiyada Kurdidu.

14. Hooyo ducadaadii Ilaahay wuu aqbalay

Gabadh Soomaaliyad ah oo aan hore qurbaha u arag ayaa waxay waddanka Iswiidhan soo gashay horaantii sagaashameedkii, xiiso gaara ayay qurbaha u qabtaye maalintii u horaysay ayay tagtay suuqa si ay wax uga soo iibsato, dukaankii ay gal is tidhaaba marka ay albaabka usoo dhawaato ayuu albaabku is furaa, waxay la yaabtay albaabkan aan cidna ka furayn ee is furaya, haddana waxay soo xusuusatay inay rumowday ducadii hooyadeed ee markii ay reerkooda ka soo amba baxaysay loo soo guntay, `` *Ilaahay umada aabbe iyo hooyo ha kaaga dhigo, albaabadoo dhana Ilaahay ha kuu furo´´*, inta ay hooyadeed wacday ayay ku tidhi, `` *Hooyo ducadaadii Ilaahay wuu aqbalay´´*.

15. Wakhtigii Soomaalida

Oday Soomaaliyeed oo qurbaha ku nool ayaa maalin isagoo balan ku leh dhakhtarka waxa uu ka daahay wakhtigii balantiisu ahayd. Markii uu dhakhtarkii soo galay ayaa dhakhtaraddii qaabilaysay oo kadinka u taagan inta ay salaantay ku tidhi, `` *Xaji waxa aad socotaa wakhtigii Soomaalida´´*, iyadoo ula jeeday inay Soomaalidu badanaa balanta dib uga dhacaan.

16. Iswiidhan kolna dhirteeda ayaa qaawan, kolna dumarkeeda

Oday Soomaali ah ayaa waxa uu xilli xagaaya tagay dalka Iswiidhan, waxaanuu arkay dal wada cagaara oo aad yaabto sida ay dhirtu u magooshay iyo dumarkii oo dhar khafiifa sita oo cadceedda isku dhigaya. Muddo yar ka dib markii la gaadhay xilligii dayrta ayaa uu odaygii arkay dhirtii oo caleentii ka daadatay oo ay dhaxan badani dhacayso iyo dumarkii oo dharkii qabowga xidhan. Isagoo xaajadaa cabirayana waxa uu yidhi, `` *Iswiidhan kolna dhirteeda ayaa qaawan, kolna dumarkeeda.´´*

17. Ma anigaa uur leh?

Markii burburkii dawladdii Soomaaliya dhacay, Soomaali aad u badan ayaa waxa ay u qaxeen daafaha dunida.

Warsame waxa uu dalka Maraykanka galay horaantii Sagaashamaadkii. Warsame waxa uu ahaa nin iska bukaana, waxaanu lahaa kalyo xanuun. Haddaba maalin ayuu u tagay dhakhtarka. Dhakhtarkii ayaa u sheegay in loo baahan yahay in kaadidiisa la baadho, waxaanu dhakhtarkii siiyay caagad yar oo uu u sheegay inuu kaadidiisa ku soo shubo laba cisho ka dibna dhakhtarka keeno si baadhitaan loogu sameeyo.

Warsame markii uu gurigii yimid hore ayuu suuliga ka galay waxaanu caagadii ku shubay inyar oo kaadiya, si uu dhakhtarka ugu geeyo. Waxaanu caagaddii dhigay suuliga dhexdiisa.

Waris oo ahayd xaaska Warsame ayaa goor fiida waxa ay gashay suuliga. Waxa ay Waris aragtay caagad yar oo suuliga dhextaala, waa ay eegtay waanay garatay inay kaadi tahay, iyada oo u malaysay in ay carruurtu ku kaadiday ayay daadisay. Qaddar yar kadib ayay xusuusatay in odaygu maalin dhawayd dhaktar tagay uuna hadal hayey in kaadi loo soo diray.

Maaddaama uu Warsame ahaa nin kulul oo ay Waris aad isaga ilaaliso waxa ay markiiba caagadii ugu shubtay kaadideedii xagiibaanay u dhigtay. Inkastoo ay Waris uur laba bilooda lahayd haddana kama aysan fikirin in ay dhib ku keeni karto odaygeeda.

Warsame ayaa maalintii danbe markii ay balantii gaadhay waxa uu soo qaatay caagadii ay kaadidu ku jirtay waxaanu yimid dhaktarkii.

Waxaa markiiba qaabishay dhakhtaradii isaga qaabilsanayd, waxaana ay ka qaaday kaadidii.
Markii ay cabbaar ka maqnayd ayay gabadhii oo yaaban oo dhidid waa weyni ka da'ayo u timi. Inta ay dhankii gudaha u kaxaysay ayaa ay u sheegtay inuu uur leeyahay. Waxaanay u sheegtay in loo baahan yahay in baadhitaano dheeraada la sameeyo, isaguna hadda iska hoydo. Odaygii oo ay talo ku caddaatay ayaa gurigiisii yimid, cidna lama uusan hadline waxa uu toos u galay qolkiisii hurdada. Waris oo ka yaabtay sida uu odaygeedii u niyad xun yahay ayaa waydiisay waxa ku dhacay. Isaga oo hadli kari la' ayuu arinkii u sheegay. Waris oo xasuusatay inay iyadu kaadideedii caagga ku shubtay ayaa u sheegtay sida ay wax u dhaceen.

18. Dhaga! Oo sownagan cirba ka bixi la

Nin Soomaali ah ayaa diyaarad ka raacay magaalada Nayroobi isagoo ku socday dalka Maraykanka. Ma uu filayn in jidku aad u

dheer yahaye waxa uu ku daalay saacadihii badnaa ee uu diyaaradda saarnaa, isaga oo ay indhihiisu qabanayeen uun hirarka daruuraha ah ee diyaaraddu dhex mushaaxaysay. Isaga oo nin ag fadhiya la hadlayana waxa uu yidhi, `` *Dhaga!*
Oo sownagan cirba ka bixi la.´´

19. Oo gabadhu ma bad bay leedahay?

Nin Soomaaliyeed oo qurbaha ku nool ayay is af dhaafeen xaaskiisii, kadibna dhirbaaxo kulul ayuu ku jiiday. Markiiba gabadhii waxay taar u dirtay ciidankii booliska, xaggii baana lagu xidhay ninkii. Markii ninkii la waydiiyey waxa uu ku dhirbaaxay gabadhiisa waxa uu booliskii ugu jawaabay, `` *Gabadhani aniga naftii ayay igu gubtay, waxaana ay soo gashay baddayda.´´* Turjumaankii oo ahaa wiil Soomaali ah oo qurbaha ku koray ayaa isaga oo hadalkii turjumaya waxa uu yidhi, `` *He said that she has buried him alive and she also entered his ocean.´´* Qareenkii maxkamadda fadhiyay ayaa inta uu yaabay turjumaankii ku yidhi, `` *Oo gabadhu ma bad bay leedahay? ´´*

20. Adeer iga wallee meeshaas aan qabowgeeda arkaayo in aanuu ninna xabaasheeda xamilayn

Oday Soomaali ah oo tegay dalka Maraykanka ayaa la qabsan kari waayay cimiladii qaboobayd ee dalkaasi, waxaanuu aad ula yaabay barafka badan ee wadankaasi ka da'a. Odaygu markasta waxa uu ku ducaysan jiray in aanuu Ilaahay ku dilin dalka Maraykanka. Maalin danbe ayaa wiil uu adeer u yahay waydiiyay odaygii sababta uu markasta ducada Ilaahay uga baryo. Odaygii oo aan jawaabtii meel fog ka doonin ba ayaa ugu jawaabay, `` *Adeer iga wallee meeshaas aan qabowgeeda arkaayo in aanuu ninna xabaasheeda xamilayn.´´*

21. Hooyooy kaalay waxaa halkan maraya adhi Muslin ahe

Wiil yar oo qurbaha ku dhashay ayaa waddankii dib loogu celiyay. Markii uu dhowr maalmood joogay ayaa waxa uu arkay orgi gadh dheer. Waxa ay ku noqotay wax la yaab leh, inta uu cararay oo uu hooyadii u tagay ayuu ku yidhi, `` *Hooyooy kaalay waxa halkan maraya adhi Muslin ahe.* ´´

Wiilka yari layaab muu lahayne, waxa uu arki jiray uun in ragga Muslinka ahi gadhka la baxaan.

22. Waar laabta u sii daa oo isku qanci inaad Gabooye tahay daqiiqadaha aad halkan joogto

Markii qurbaha la tegay waxa dad badani sheegteen beelaha la hayb-sooco ee Gabooye, Tumaal, Yibir iwm maaddaama iyaga ay u nuglaayeen Dawladdaha Reer Galbeedku oo ay fududayd in la qaabilo oo sharci iyo deggenaasho la siiyo. Si ay sharcigaa u helaan Soomaali badani waxa ay ku kalliftay in ay sheegtaan magacyada beelahan la hayb-sooco inkastoo cidhiidhi badan laabtoodu dareemaysay. Qaar badan markiiba dareenkooda ayaa laga ogaan jiray in waxan ay sheeganayaan aanu dhab ahayn oo ay been sheegayaan. Nin Gabooye ah oo turjumaan ah oo arrintaa ka warramaya waxa uu yidhi, `` *Nin Gabooye sheegtay oo isku dhiibay baa ii yimid. Wuu naxnaxayay, abtirsiintiina wuu isku dhex qasay. Markaan xaalkiisa arkay maaddaama oo aan ahay ninka laga xaqiijinayo inuu yahay reerkan uu sheeganayo ayaan ku idhi,* `` *Waar laabta u sii daa oo isku qanci inaad Gabooye tahay daqiiqadaha aad halkan joogto.*´´

Muuse Maxamuud Ciise (Dalmar) waa qoraa iyo hal-abuur da yar oo Ilaahay hibo u siiya

Curinta iyo ururinta sheekooyinka maadda xambaarsan. Waa qoraagii buugga Hantaaqo Jacayl.
Muuse waxa uu inta badan ka shaqeeyaa arrimaha bulshada, waana Gudoomiyaha Naadiga
Akhristayaasha Stockholm. Muuse waxa uu arday ka yahay oo uu degan yahay waddanka Sweden.